# HUBSIIMO LA'AAN

QISO JACEYL



W.Q. Max'ed Guled A. (SEYGA)

Taxanaha Seyga "6"

# HUBSIIMO LA AAN

Maxamed Guuleed Aadan „Seyga"

Fadlan akhristayaasha xiiseeya qisooyinka wixii khalad ah oo aad kala kulantaan ha u qaadanina ee waa gillad ka katimid xagga farsamada. Waxaad noo soo qori kartaan wixii waano wixii waano aad noo heysaan idinkoo aad u mahadsan.

P.O.BOX. 3906

MAXAMED GUULEED AADAN "SEYGA"

Muqdisho , S o m a l i a.

MAHADNAQ

Waxaan alkaam uga mahad-celinayaa DHammaan jaa-llayaashii gacanta buuxda igu siiyey qoristii iyo soo saaristii buuggan, gaar ahaan C/llaahi Abuukar Busuri oo aan marnaba hilmaami karin wax-qabadkiisii, Istarliin Cabdulle Yuusuf (ISTAR), Cabdi-shakuur Mire Aadan, X.Shiikh Biixi, Cabdullaahi Cabdi Xuseen, Yuusuf Cali Mayow, Yuusuf Abiikar Cali, C/llaahi Maxamed Ibraahim (atlas) iyo Siciid Hagar Camalow.

Waxaa kaloo iga mudan inaan xuso saaxiibkey Yuusuf C/llaahi Sheekh, Madiina Maxamed Yarow, Fowsiya Cali Yaasii Tufaaxa C/llaahi Shiikh, Cali Axmed Nuur iyo Cadnaan C/aadi Cadde .

Ma illaawi karo Abuukar Xasan Afrax (jareere) oo farshaxanka jaldiga buugga gacantiisa ku xardhey.

Xuquuqdu waxay u dhowrsan tahay qoraha buugga oo mud fara badan ku howlanaa soo bandhigidda qisadan.

Daabacaadda Koobaad .......... 198

Muqdisho ................. 198

Buuggan lama daabacan karo, lamana turjumi karo iyadoo aan oggolaansho laga helin qoraha buuggan.

Buuggan waxaan u hibeeyey saaxiibkey qaaliga ah walaalkiis.

"Saadiq Cabdullaahi SHiikh"

HORDHAC

Sidiisaba Qoraalku waa iftiin furaya waxyaabaha qarsoon, waana tebiye waxay bulshadu xiiseyneyso inkastoo uu madadaalo yahay waxay bulshadu kala dhex baxdaa wax - yaabo ay ku cibraqaataan . Waa hubaal in shakhsi kasta uu wax qoro kolkii ay la soo gudboonaato waxyaabo uusan la kulmin . Ma fiicna in bulshada loo soo bandhigo qiso aan dhadhan laheyn haddaba daalaco dhacdadii wacneyd ee "Hubsiimo La'aan"

W.Q. Maxamed Guuleed Aadan "SEYGA"

QAYBTA KOOWAAD.

Wuxuu ahaa isbitaal aad u bilicsan oo ku yaalay meel magaalada ka yara baxsan.Wuxuu u qaybsamay qaybo fara badan oo jirooyin kala nooc ah lagu daweeyo. Waa isbitaal aad u raaxo badan. Wuxuu lahaa barxado iyo beero uu ubax aad u qurux badani kabaxay oo loogu tala galay in ay bukaanku ku nastaan, gole madadaalo waxkastoo aad u baahataba wuu lahaa. Waxaa maamule ka ahaa qaybtiisa dadka qaba cudurada nafsaaniga ah khabiir layiraahdoDr.Johnson oo aad loogu kalsoonaa shaqadiisa_isagoo lahaa khibrad aad u bal aaran,taas oo keentay inuu noqdo dhaqtarka ugu qaalisan dhaqaatiirta isbitaalka.

Xafiiska Dr.johnson oo ahaa mid qalab aad u qurux badan oo raaxo leh uu ku sharaxanyahay ayaa waxa lajoogay nin iyo naag Soomaali ah ,waxayna ahaayeen waalidiinta gabar bukaan ah oo uu dhaqtarku daawaynteeda faraha kula jiray.

Dr.johnso intuu koodhkiisii shaqada iska bixiyay oo uu koofiyadiisiina katabaan ka saaray ayuu miiskiisii fariistay.

"Gabadhiinu way ladanyahay,"ayuu warbixintiisii ku bilaabay,"Caafimaadkeeda marki aan guud ahaa fiican u baaray wax cudur culus ah oo ay qabto malaha waxay kali ya oo qabtaa bukto dawadeedu mid kaliya tahay,dawadaas waxaan isku dayay intii aan kari karo in aan hilmaansiiyo si ay noloshda ula qabsato.

hadaba waxaan u baahanahay in aad i caawisaan si aan wax uga qabto".

"Dhaqtarow,maxaa nalooga baahanyahay "ayuu ninkii waydiiyay".

"Waxaan ogaaday in gabadhan ay wiil is jeclaan jireen wiilkana aad u diideen in ay isguursadaan.taas ayaana keentay in cudur uu jacaylku ku noqdo".

"Jacaylka waxa layiraahdo,hadii aad taqaaniin waa cudur,marna ma'aha .

"Hadii uu qofku wax uu jeclaa uu waayo aydhacdaa in uu wax yeelo u geysto, hadaba hadii lahelo waxa uu jecel yahay ay uu nolosha ku qancaa,marka uu waayana marar badan ayay adkaataa sidii uu qofkaasi naftiisa ugu qanci lahaa.

Hadaba waxaan idinka doonayaa in aad wiilkii iyo gabadhii aad isu ogolaataan, hadii kale......"

Dhaqtar hadii kale maxaa dhacaya?" ayuu ninkii waydiiyay?

"Hadii ay iswaayaan nolosheeda ayaa khatar ku jirta",ninkii wuxuu bilaabay in uu naagta lafadhida oo aan afka ingiriisi garanaqoon uga turjubaano soomaali,"

Naagtii waxay sheegtay in ay adagtahay sidii arintaa loo xalinlahaa. dhakhtarkii wuxuu yidhi markii loo fasilay "hadii ninkii ay rabtay loo waayo nasiib daro ayaa haysata.marka ku laabta wadankii nii,waxaanad igu caawisaan in aad daawadaa soo heshaan joogitaankiinuna halkan waxbamatarayo.waxaa laydinka rabaa in aad isku



daydaan inaad xalisaan.soo diyaar uma ihidin?" "wixii waxtar u ahba anagu diyaar ubaanu u nahay ayuu ninkii ku jawaabay.

"Waatahay hadaba si aynu nolosheeda u bad baadino idinku isku daya inaad wiilkii ka dhaadhicisaan in ay sidaa gabadha xaaladeedu tahay,ba in niyadeeda wax iska badalaan.Anigu sidii kale aan ku badbaadin karo ama haday idinka idiin suuro gali waydo aan kaga maaransiin lahaa baan ku dadaalayaa".

Naagtii markii loo fasilay waxay sheegtay in ay karaankeed dadaali doonto,"nasiib wanaagsan "ayuu dhakhtarkii ku soo gabagabeeyay.

Naagtu waxay ahayd Xaajiyo binti gabadha bukaanka ahna iyadaa dhashay,ninku waa walaalkeed oo layidhaahdo Xasan in muddo ahna waxa uu ka shaqaysan jiray shirkad -batroolka baasaarta oo sacuudi ah markaykayimaadeen isbitaalkii oo ay huteelkii ay daganaayeen kusoo laabteen ayay aad uga wwada hadleen aayaha gabadhooda.walaacbaa islaanta kamuuqday,wal wal iyo natiijo xumo ayaa horteeda ku sawiraa.deg deg waa in ay soomaaliya ugu laabataa,soona heshaa wwadadii gabadheeda samata bixin lahayd. Su'aashu waxay kataagnayd meesha ay arin kabilaabi lahayd,waxaa u muuqanayay waxay fashay oo dhan...Hadii ay adduunyadu waaya aragnimo tahay,waqti waanu soo barin waxa hubsiimo la'aantu keento.

Sikastaba ha ahaatee Binti waxay ku t

talo gashay in ay jiidho darbi kasta oo-lagayaabo inuu isaga gudbo bad baadinta gabadheeda geerida qarka u saaman.inta a aynu ogaanin in ay guulaysatay aynu dib u milicsano wax mashaakilkan unkay,aan-dib ugu laabano taariikhda dhawrsano kah or.

## .QAYBTA LABAAD.

Saadiq isagoo sibilicsan u soo labis tay ayuu casar gaabadkii soo baxay isa goo u soo socday goobtuu balanta ku lahaay wax aad u farax galiyay jawiga wacan ee kalabtaas magaaladu lahay,neecaw udgoon oo niyada kuu sifaysa ayaa kasoo dhacays ay dhanka koonfur galbeed,iyadoo dhirta quruxsan ee magaalada ku dhex taal laama heeda ruxaysay,

Daruuro teel teel ah ayaa cirka har eeyay,iyadoo muuqaalka guud ee muqdisho wax wayn ku kordhisay,dareen xiisa leh iyo farxad aan laqiyaasi karin ayaa cam irtay wajigiisa,Niyadiisu waxay jeclayd mar walba inuu saaxiibkii kakulmo,maa-daama waqti badan aysan is arkin.
Wuxuu ku soo socday wadadii aadilahayd goobtii uu balanta ku lahaa.Qadar daq-iiqada ah markii uu soo lugeeyay isagoo soo hoos maraya daarihii xamar weyne - ayuu markali kawar helay biyo wasakh ah oo dhamaantii wada qooyay.kor buu fiiri yay waxaysr indhihiisu qabteen gabar dig



si way gacanta ku hayso oo dariishada qoorta kalasoo jeedda wuu isfiiriyay;sar-waalkii iyo shaatigii waxa qariyay uskagii ku jiray weelka,wajigiisuna kabasii daran, marnaba ma uusan malaysanaynin inuu taasoo kale lakulmi doono.Duraba caraa gabigiis w wada saaqday.

Markale ayuu kor fiiriyay isagoo garan la'talaabadii uu qaadi lahaa,edeb daro iyo ulakac bay la'ahaatay in saa loogu galay. hayeeshee gabadhii falka geysatay meeshii majoogto.isagoo garan talaabadii uu qaadi lahaa ayay gabadhii oon dhag laqabtin lahay irridii u dhawayd kasoo baxday/

Waxay ahayd gabadh maariin xigeen ah; timeheedu dhuxul oo kale ayay u madoobaa-yeen ladaeeda in dhoodna waxaa kamuuqday - soo jiidasho heersare ah;dibneheeduna casa an diq ah dherer iyo laxaadna aan laga xastin. Intay u soo dhawaatay ayay tidhi"A Awoobe kun jeer iga raali ahaw mana kaa ma laysanaynin in aad meesha soo maraysid,wax aan aad uga xumahay.sidaan kuu galay ee gu riga soo gal aan dharka kaadhaqae.Aad ayaan uga xumahay....

Saadiq markii uu arkay gabadhu sida a ay uga xuntahay ugaba cudur daaranayso ayuu iska calool fayoobaaday,wuxuuna kuyiri"Aba ayo macaan macno malahan hadaadan ula kac u yeelin waadna mahadsantahay xaafadii aya an ku noqonayaa oo ku soo dhar badalanayaa

Awoowe sidee adigoo iga xun aad iiga gartaa".iyadoo u soo dhawaanaysa xagiisa - Saadiq intaas waxaa uga siidarayd balanta

uu ka daahay. Waxaa maskaxdiisa ku sawirayd saaxiibkii oo sugi la',kursigii uu kufadhiyayna hadba ka kacaya;qofkii baarka u soo oso cdana uu isagii u maleeyo,saacadii u xirnay dna hadba fiirinaya,kuna tala jira inuu iska baxo. Gabadhii ayuu mar kale usoo jeestay wu xuuna ku yiri"waxba kuuma haysto,laakiin wa xaa iigu darnaa meeshii aan u socday oo aan ka daahay,sidaas aawadeed waxaan door biday inaan gurigaygii si dhakhso ah ugu laabto oo nabad galyo".

Hadaba kaalayoo dhaq dhaqo," ayay ku tiri,iyadoo gacanta soo qabanaysa.Taas buu ka ogolaaday,timaha iyo meelihii ugu darnaa ee wasaqdu ka gaartay uu iska dhaqay ayuu kasoo tagay. Wuxuu kasoo dhaqaaqay isagoo uur fayow,cudurdaarkii gabadhana garwaaqsa day.Balse gabadhii markii aysoo dhaafisay ilinkii wali kama aysan harin oo waxay sii waday raali galin;sagoontis wacana way ugu dartay.

Markii uu yimid baarkii wuxuu istaagay horaanta,isagoo marba dhinac kafiirinaya sa axiibkiis,markii danbe ayuu arkay isagoo me el koone ah kursi ku fadhiya,sigaarkiisuna uu u shidnaa.Wuxuu usoo dhaqaaqay xaggiisii markii uu dul yimidna wuxuu iska ku xaday - miiskii hortiisa yaalay,wuxuuna arkay inuu sigaar damiyaha uu ka buuxo sigaar badan.. Wuu salaamay.

"Ookaalay!maxaad sidaas iigu gashay?, miyaadan ahayn nin xishoonaya oo shaqsiyad iyo diinba leh".



Bashiir baa saaxiibkii ku yidhi markii ay wada fariisteen,isagoo carro wayn wajigi isa ka muuqato.

"Walaal aad iyo aad ayaan uga xumah ay inaad kaligaa halkan fadhidid intii a aan kaa maqnaa,kumana hilmaamin oo qalbi gaan kugu hayay balantii aynu wada dhiga nay".Waxaan had iyo goor dhererayay inta laga gaadhayo wakhtiga,diyaarna waan u a ahaa inaan oofiyo.laakiin waxaa igu dhac ay arin lama filaan ah..."

"Maxay tahay arintaasu?ayuu Bashiir lasoo booday. Saadiq wuxuu uga waramay g gabadhii biyaha wasaqda leh kusoo shutay markii uu gurigoodii soohoosmarayay.

Waan ka xumahay ayuu Bashiir yiri oo intuu adeegihii baarka u yeeray kaha codsaday inuu cabitaan u keeno.isagoo - sii wata ayuu yiri"Saaxiib safarkii aan u baxay wuu igu dheeraaday taleefoonkii aad ii soo diri jirtay iyo waraaqihiina waad iga goosatay sababtana magaranayo.

"Waa runtaa laakiin waxaan kuu shee gayaa in ay hawshii iga badatay."

Kabax arintaas.waraaq ama taleefoon iima aadan waayin daqiiqado yar oo aad w wakhtigaaga firaaqada ah iiga heshid,hadaba galabta waxaan doonayaa inaan ku gu doonsiiyo hadiyadii aan kuugu soo talo g galay.Saadiq intuu dhoolo cadeeyay ayuu yiri"waad mahad santahay,maxaadse sidaas isugu soo dhibaysaa.

Bashiir oo qoslaya ayaa yiri"saaxib

ncii aan kaa maqnaa miyaad guursatay? si
gooni ah ayaadba iila dhaldhalaalaysaaye
"maya ayuu Saadiq yiri walina ma aanan gu
uraan markii lagaarana waa inaad goobjoog
ka ahaatid sababtoo ah waxaad tahay saaxi
ibka kaliya ee aan ku dhaato,laakiin wakh
tigan lajoogo guur diyaar uma ihi".

"Hadaba iga dhagayso ayuu Bashiir yi
ri waxaan diyaar u ahay gabar aan muddo-
isku mehersanayn,waxaan filayaa inaad kaa
lin xoogle kaqaadanaysi. Waxaan kuu balan
qaadayaa inaan kaalin taydii si walaalti-
nimo u gudan doono,laakiin waxaa jirta hal
arin oo aan kacudur daaranayo inaanan sam
ayn karin ",Bashiir oo kursigiisa soo dha
waysanayo ayaa yiri".

"Inaanan malxiis kuu noqonkarin,sabab
too ah taariikh hore ayaan soo xasuusanay
aa,waxaanse kaa balan qaadayaa agaasinka
guud ee xafladda inaan qayb loo riyaaqo
kaqaato.

"Sidee bay ku dhici kartaa adigoo
goobjoog ah inuu dhinacayga fariisto nin-
kale ee saaxiib runta ii sheeg,"

Saadiq wuxuu kadhaadhiciyay inuu aad
u xishood badanyahay uuna soo horfadhiisan
karin dadka meesha isu yimid,saas aawadeed
ay suuro gal noqoto inuu barnaamijku dhaa
wacmo .

Bashiir intuu garaystay,wuxuuna oga
aday inay dhib ku tahay ayuu kadhaafay.

Hutel curuba ayaa loo qoondeeyay in



lagu qabto xafladda,isagoo lahaa barxad -
wayn oo loogu talagalay aroosyada,darisna
wuxuu layahay bad weynta hindiya,halkaas
oo ay kasoo dhacaysay neecaw macaan,waas
kadana habeenkaa waxaa kabuuxay biyo noo
coodu ahaa buluug xigeen indhahana u roon
geesaheedana waxaa kamuuqday shimbiro af-
kooda kasoo daadinayay biyo,nalal iyo buu
fino,daahyo midabo kala nooc nooc ah leh
ayaa ku xirnaa darbiyada,iyadoo albaabka
martida kasoo galaysay ay dul sudhnaayeen
nanal kasamaysan xarfaha ay kakoobnayihiin
soo dhawaada,waxaana lagu casuumay dad aan
yaraynooo magaalada caan ka ahaa,una badn
aa odayaal ay Bashiir ganacsato isla ahaa
yeen,iyadoo loo wacay kooxda caanka ah ee
Iftin.

Saadiq uma suuro galayn inuu habeen-
kaas dhinac kafariisto saaxiibadiis,maad-
aama uu ahaa xiriiriyaha barnaamijka.
Iyadoo lagaaray waqtigii furitaanka xafla
dda ayaa loo yeeray saadiq oo dad martida
kamid ahaa soo dhawaynaya,iyadoo lagu yiq
iinay cod karnimo.

Saadiq wuxuu soo hor istaagay marti
dii isagoo ay wajigiisa kamuuqato farxad
aan laqiyaasi karin. Wuxuu gashanaa dhar
aad u quryx badan oo kakoobnaa shaati cad
oo jaakad madaw kakorayso,qoortana uu uga
giijisnaa garafaati nus ah,surwaal madaow
iyo kabo iyaba madow ah.Wuxuu ahaa wiil -
dhalinyaro ah,joog iyo soo jiidashana is-

ku darsaday,timihiisu waxay u jarnaayeen afro, shaarbo dhaadheer ayuu lahaa,intuu gacanta ku qabsaday codbaahiyihii ayuu yiri"mudanayaal-iyo marwooyin waxaa sharaf weyn noo ah sida-wacan ee aan uga soo dadaqayb galay arooska ay dhiganayaan walaaleheena kala ah Bashiir iyo Drs?Tufaax,xafladiina waa noo furantahay/

Midwanaagsan buu jawigu ahaa,iyadoo bad waynta hindiya ay kasoo dhacaysay neecaw mac aan oo lagu wada qancay,xafladuna sifiican a ayay isugu duba dhacday. Waxaa lagu fadhiyay kuraas heersare koo dhigay,ayna gashanaayeen codareyaal kalanooc ah,waxayna uyaaleel af ar iyo miiskooda oo loogu talagalay dadka is lasocda,waxaa kaloo jiray kuraas loogu talag alay dadka odayaasha ah.

Aragtidii u danbaysay waxaa saadiq indh ihiisu qabteen gabar kaligeed meel koone ah kursi kula fadhiday,iyadoo gashanayd dhar aad u dhal dhalaayay oo soo jiidasho lahaa,kana-koobnaa shaati buluug ah iyo goono jiinis ah waxay kaloo wadatay boorso midabkeedu isugu dhafnaa cadaan iyo gaduud,una saarnayd kursi kasoo horjeeday.gacmuhu waxay u saaraayeen miiska,iyadoo wajiga hoos u foorarisay;waxaa na kamuuqday fakar dheer.Saadiq niyadiisu wa xay jeclaysatay inuu xaggeeda ka agdhawaado, laakiin intuu kusii socday ayuu wajigeeda si qumaati ah u sii fiirsaday,wuxuuna niyadda iska yidhi"walee gabadhan wajigeedu kugu mac usbee xageed ku aragtay?,mase xasuusataa mee shay ahayd?xasuus gaaban ayuu dib isugu noq-



day,cajladihii maskaxdiisa kuduubnaa ayuu furfuris ugu dhaqaaqay,nasiib wanaagse wuu gartay.Intuu isgeesinimo galiyay ayuu soo aaday booskii ay fadhiday,wuxuuna hadalka uga bilaabay,"walaal kursigu ma firaaqaa?" isagoo gacanta ku taabanaya.

"Haa ayay tiri.walaal laguma fadhiyo w waadna ku fadhiisan kartaa iyadoo kasii qa adanaysa boorsadii kursiga u dulsaarayd.

"Mahadsanid"ayuu ku yiri.

"Adigaa mudan walaal"ayay u sii raacis ay.

Markii uu kursigii salka lahelay ayuu si kaftan ah u yiri"Walaal miyaad iska bad ashay dabeecadii,mise sidii aan kugu ogaa ayaad tahay?,isagoo sii qoslaya.

"Aboowe maba igaranayside maxaad sidaa iigu leedahay?mise gabar aad taqaanid ayaad igu khaldaysaa?"

"Aqoon yaan kuu leeyahay,saw matihid g gabadhii gurigii dheeraa biyaha iiga soo e shubtay;;;;."

"Ma adiguu ahaa walaal magacaa?"

"Saadiq ayaa lay yiraahdaa,adigana?"

"Faatma,waxaana ku magac dheerahay in dho u roon".

"Walee qofkii kuu bixiyay naanaystaa been masheegin";

"Aad ayaan uga xumahay galabtaas,hab eenkii oo dhan waan geexan waayay,waxa ana i hor imanayay muuqaalkaaga ii iyo sid ii fool xumada lahayd een kuu galay.Haddii

aan aqaano gurigaada waan kaasoo raadin lah aa,nasiib xumase waan garan waayay.
waxaa farxad inoo wada ah caawa inaan kuwada kulano xafladan qiimaha leh,iyadoo gacantii sa soo qabatay,kadibna rabta inay dhukato. Macno ma lahan waxyaabahaas kuwo kadaran ay aa isoo maray waxbana iima ahayn,cafina waad iga tahay,ayuu kuyiri.

Intay saacadii u xirnayd fiirisay ayay madaxa rux ruxday,boorsadii oo dhineceeda - taalayna ayay gacanta kusoo qabsatay.

Saadiq dareen ayaa galay,wuxuuna kuyiri "walaal xaggeed u socotaa?"isagoo rabay inuu sarajoogsado".

"Waxaan jeclaan lahaa inaan sii baxo".

"Walaal hadda halkee baad u ordaysaa? ileen xafladdu wali way dhimantahaye."

"Waan ogahay kaakiin waxaa jirta duruu fo ii diidaya waqti danbe in aan joogo."

Isagoo qoslaya ayuu yiri"Faatma guriga miyaa lagaa xiranayaa oo aad ka cabsanaysaa?"

"Midaas kama baqanayo ee waxaa jirta in aan kaligay ahay aysana jirin ruux i weli heliya,aana cabsanayo haddii waqti danbe la gaaro."

Waa runtaa sababtoo ah gabar in ay wa qtigan wixii kadanbeeya socoto sharaf u ma aha •Hacabsanin intii aan kula socdo hadaba ina keen aan ku sii dhaweeyee.

Intii ay sii socdeen jidkii aadi lahaa guriga Faatma ayay ku bakadeen meel in u jir ta halkaas oo lahayd meel fadhi ku haboon.



Waxay u biloowday iney saadiq uga sheekey so xaaladeeda , waxayna uga biloowday wax aan la noolahay hooyadeey, walaalana ilama dhalan oo madi baan ahay, Aabahayna waxuu dhintay anigoo da4yar aadna wuu ii jeclaa. Ardayad dhigata Dugsiga Jamaal Cabdi Naas ir ayaan ahay, Galabtiina Hooyadeey ayaan kaalmeeyaa, Kana faa'iideystaa hoowlaha la xiriira Ganacsiga. Da'deeydu waxay Gag-aha la gashay 20 Sano, Waxaanan Jeclahay inaan mustaqbal fiican ku noolaado haduu ilaahay idmo, Koleytaba hadda waan is bar-anay, Waxaanan jeclahay inaan sidii hore isaga soo dhawaano, Maadaama ay dhici kar-to inaanu isku sii dheeraano. Isagoo uga waramay noloshiisa heerka ay mareyso.

Nin da'daalaya ayaad tahay ee meesha-ada ka sii wad, Natiijada aad rabtidna wa ad gaareeysaa, Iyadoo u sii dhoola Cadeyn eysa ayeey saa ku tiri. Waxaan kaloo si i jeclaan lahaa ineysa is barashaden hal kan ku sii ekaanin ee aan yeelano kulano danbe oo ina xiisa galiya,Si xiriirkeenu u sii wanaagsanaado.

"Walaal goorma ayaad is leedahay wey ku haboon tahay kulanka danbe"? Ayuu Saad-iq yiri.

"Waxaan jeclaan lahaa inaanu ka dhig ano Habeenka khamiista ah ee aan firaaqo leeyay".

"Meeqa Saac Iyo Halkee?"

"Hal saac iyo halka aynu hada taagan-ahay?."

Saadiq waxuu ku soo noqday xafladii,

Waxuuna aad ula dhacay sida wanaagsan ee aay dhalinyaradu u ciyaarayeen. Saaxibadiis mid ka mid ahaa ayaa ku khasbay inuu kaalinta u ga aadan ka qaato, Wuuna ka aqbalay.
Waqti Danbe ayaa la garay, Waxana la soo gabagabeeyay Xafladii, Si Wacan ayaa loo sii Galbiyay Arooskii iyadoo dhalinyaradii badankoodu ka qeyb galen.

Waxuu ogaaday in waqtigan wixii ka danbeeya uu fasaxan yahay, Maadama uu ka soo faraxashay hoowshii. Waxuu jeclaa inuu Saaxibadii la sii fiidsado, Laakiin waxaa u diiday daal fara badan oo ka muqday jirkiisa, durbadiiba waxuu soo abaaray Gurigii isagoo rabay inuu helo Nasiino ku filan. Sariirtii sii ayuu isku tuuray fakar dheer ayaa hal mar ku soo wada furmay, una diiday inuu hordo. Kolba dhinac ayuu u raftaa oo is yiraahdaa dhinaca kale wuu kaaga roon yahay, Laakiin wuuba uga sii daraa, Naftiisu waxay jecleysatay inuu soo xasuusto aragtidii ugu danbeysay ee Gabadhii Quruxda Badneyd, Cabaar ayuu Gam'ay, Markii Danbana Waxuu ku soo Baraarugay isagoo Sariirtii ka soo dhacay, Waxuu ogaaday inuu riyo ku jiro Waxuu ilaahay ka baryay inuu riyadii Habeenkaas Run uga D dhigo.

Waqti Dheer ayey isu diyaarineysay qolkii ay ku dhex jirtay inta badan waxay ku mashquulsaneyd timaheeda oo aad u dheeraa Muraayadii Dheereyd ee Armaajadda ku dhaganeyd ayey soo hor istagtay si ay u saxato muuqaalka Guud. Wajiga Waxaa u marsanaa Waxyabaha ay Dumarka isku qurxiyaan oo kala noo c ah, Waxaana Habeenkaas u sii dheeraa iney soo xirato dhar mar dhaw dibadda looga keenay. Ugu Danbeynti Waxay ku soo noqotay Muraayadii si ay isugu fiiriso marki ay aragtay quruxdeeda iyo sidey u dhaldhalaaleyso ayey niyadda iska tiri, "Caawo Magaaladda Hablahooda adaa ugu sita."



Qolkii ayey ka soo baxday waxayna soo hor istaagtay Albaabka iyadoo jecleyd inta yar ee waqtiga ka dhiman iney guriga isku sii madadaaliso. Habeenkaas ma aysan jecleyn iney shaqo qabato maadaama aysan diyaar u aheyn. Waxay aad u cabsaneysay iney hooydeed aragto.

Faatma Hooyadeed Waxay ka naxsan tahay Jirada Degdega ah ee Walaalkeed ku timid, loona soo sheegay isla habeenimadaas, Lagu na yiri Sitimaankan ku imow."Waxay dulsaaran tahay Sariirta iyadoo dhexmushaaxeysa fakar dheer, Waxaysa Garan la'dahay meeshay wax ka bilaabi lahayd. Intey Garbasa rkeydkii oo u yaalay dhinaceda soo daftay ayey ka soo baxday qolki waxayna rabtay iney boostada aado, Laakiin waxay aragtay Faatma oo horaanta albaabka taagan, Waxayna ku tiri, "Hooyo Caawa waad labisan tahaye ma anigaad i raaceysaa "?.

"Maya Hooyo Macaan."

"Ee Xageed u socotaa, Caawa Xaalkaagu maba yaree." Hooyo Waxaan u socdaa Gabadha dariska nala ah oo iga qaadatay Diraceygii cusbaa ee sitimaankii hore aad Jabuuti iga kentay, Kolkii hore waad ogeyd iney iga ch

Dhumisay Katiinadeydii Dahabka aheyd.

Gacanta intay ka soo qabatay ayey la s soo gashay qolkii u dhawaa waxayna ku kala fariisteen laba Kursi oo iska soo horjeeda waxayna ku tiri Hooyo Caawa ma aad baxeysid wax kasta haddii ay dhacaan!? Alaabta aad e sheegeysid maalin kale ka soo qaado.

"Hooyo Macaan Maxaa dhacay?"

"Waxaan Rabaa inaan kula hadlo, Anoo a ayaamahan danbe kuu bogin, Waxaad tahay Gabadhii Caruur oo dhan aan ka fiirsaneyay mana jecli inaad noqotid kuwa aan arkay. Waxaad si fiican u dhageysataa Waanada aan ku leeyahay."In yar ayey amuustay. "Mar dhaw Waxaan Rabaa inaan Aado Sucuudiga, Muddo aan Badneyn ayaan ku maqnaanayaa waxaad yeeshaa Guriga si fiican u ilaali, Dukaamadda Ijaarka K Ka Soo wada Qaad Waan lawada Socod siiyay, Lacagtana Koontada Bangiga kuwada Shub, Ragana iska ilaali oo ha isku dabcinin."

Dareenka Faatima uma uusan soo jeedin Bardaaranka Hooyaded, Markastana Waxaa u Muuqday Goobtii ay balanta ku lahayd oo Saadiq Kaligiis Taagan yahay, Waxaysa ka walwalsan eyd sidii ay isku arki lahaayen. Saacadii u xirneyd ayey isha ku xaday, Waxayna Ogaatay iney waqtigii Balanta Dib uga dhacday.

Marnaba Niyadeeda Ma aysan jecleyn iney ka daahdo haldaqiiqo oo kaliya, Laakiin waxa ka hor istaagnaa Hooyadeed oo lafdhuun gash ay ku noqotay. Mar walba waxay ku dadaaleys ay sidii ay ugu suurtobi lahayd iney dibadda u baxdo iyadoo is ticmaaleysay xeeladaha Gabdhaha.



Habeenkaas Faatma Waxay u aheyd Habeen Farxadeed Maadaama ay u aheyd Kulankii Laba ad ayna jecleyd iney oofiso Balantii ay Saadiq ka qaaday. Waxuu ugu muuqday Nin Wanaagsan, Edeb Iyo Dabeecad Fiican isku darsaday, Waxuu waxyaabahaa Dhalainyaradda badankooda ay kula dhaqmaan gabdhaha Jeclaadaan.

Faatma oo is celin kari weyday ayaa la soo booday Hooyo Macaan aan soo qaato Diraca, una Sii raacisay, Xataa Foowsiyo Waxay Saakayto iga qaadatay Buugii Xisaabta Barina Waxaan leeyahay Imtixaan Ee Hooyo Macaan Tobon Daqiiqo ii Fasax aan soo Arkee."

Intey u adkeysan weyday Caabaatinkeeda ayey ku tiri Orodoo bax si Degdeg ahna ku imaaw." Waanan ku sugayaa Hadalkii Wali kuuma aanan Dhameynin.

Markii ay Faatma Baxday ayey u yeert ay Adeegtadii oo ku jirtay Kushiinka, Wax ayna la Socodsiisay iney Mar dhaw Baxeyso waxaana lagaa rabaa inaad Ogaatid Guriga iyo Arimahiisa. Adigoo Laba Jir ah ayaan kaa soo watay Hooyadaa Ilaahay Ha u Naxariistee waxaana ka fakaraa wixii aad u baahatid iyo walibana anigoo jecel in aad mustaqbal fiican igula noolatid. Hooyadaa M-Meesheey kuu taagneyd oo kale ayaan kuu joogaa ee waxaad yeeshaa Gabadhan aan dhalay Baryahan Danbe uma Bogin ee intii aan Maqnahay il Gooni ah iigu fiiri.

Kor dheerna kala soco Waxyaabaha ay Sameeyneeyso oo dhan, Goortii aan imaadana si tafaf tiran iigu sheeg adigoon iga qarin Safarkana waxaan kuu keenayaa Hadiyad aad ku Faraxdid.

"Waa Yahay" Ayey la soo booday Markii ay maqashay Hadiyad, Waxayna u sii Raacisay, "Hooyo anigaad igu ogtahay shaqadda aad ii dirtay ee ilaahay ha ku soo Urmriyo".

Faatma aad ayey u faraxday Ogolaanshihii, Waloow Waqtigii Balanta Dib ugga dhacday. Waxay Orod ka soo Biloowday Gurigood ii ilaa ay ka timaado Goobtii, Dhididkii ka baxayayna uu qooyay Dharkeedii imaasho Dabadeed, Waxay aragtay Saadiqoo Meeshii Fadhiyay Intey ku soo booday ayey si Xadaarad leh u salaantay isaguna si ay ku qanac do ayuu uga qaaday. Waxay aheyd Markii ugu Horeeysay ee uu Jirkoodu si Qumaati ah isu taabto, ayna Fool ka fool isaga soo horjeestaan. Habeenkaas oo ay dhaceysay Dhaxan aad u qaboow, Lakiin qofna ma uusan Dareemeyn, Waxaana ugu wacnaa Jaceylka ay isu qabaan Labadooda Farxadna wey wada bandhigayeen, Damaashaadka weyn inta la xisaabiyo, tuu dareemay Habeenkii ay is barteen. Waxuu mooday Cawadaas intii ay kala maqnaayeen iney la ekeyd Hal Sano, Waxayna la ahaatay inuu Gacanta Ku Qabsaday Xuural Ceyntii aduunka, Niyaddana Waxuu iska Yiri "Tolow Ma laga yaabaa in aduunkan Lamaanaha ah Xabiibkeeda Qaaliga ah aan Noqdo.



Si aan uga wada baxno cidladda aan kuwada jirno. Farxaddii Habeenkaas Ma aysan aheyn mid la tilmaami karo.

Markii Danbe Waxuu Dareemay inuu Wajigeeda uu ka duwan yahay Waqtiyadii ay is arkeen, Waxuuna ku yiri "Gacaliso Caawa si gooniya ayaad u didsan tahay ee maxaa kugu dhacay?"

Intay indho Jaceyl ku fiirisay ayey si tafaftiran uga sheekeysay qisadii dhex martay iyada iyo hooyadeed.Fursada aan soo helaynaw waxay ahayd anigoo kusoo marmarsiyooday inaan gabdho kasoo qaadanayo alaab. Sababta aan kaaga soo daahayna waa middaas mana jeclayn inaan kaasooo daaho,waxaana i qabsaday wacdaro iga wayn,waxaa iigu siidarayd markii aan maqlay ma baxaysid oo xaddeeydii oo dhan wada istaagtay waxaana igu abuurmay murugo iyo ciil, Niyaddana Waxaa iiga sawirmaa meesha cidladda ah ee aad fadhidid, Anigoo ogsoon Qiimaha Balantu Leedahay Iyadoo Wajigeeda Hoos Usii jeedineysa ayey u sii raacisay, "Aboowe Iga Raali Ahow"

Markii uu dhegeystay Waxuu Garwaaqsaday hadaladii ay u soo tabisay, Isagoo Ogaaday iney Dhab ka tahay,

"Aboowe Caawa Waxaan Jeclaan Lahaa in aan Meel isla Dhigno Arimo labadeena Inaga dhaxeeya, Si aan u abuuro Geedkii aan Bari to harsan lahayn, Waxay Kaloo ka Codsatay inuu arinteeda u eego Si Naxariis ku dheehan tahay. Nasiib xumase Habeen kale ayeynu

ka dhiganeynaa, Sababtoo ah Fireqo Toban Daqiiqo ka badan ma heysto, Hooyana ay igu Sugeyso si ay iigu dhameeyso Dardaarankii Qabyadda ahaa. Intey soo istaagya oo dhexda ka qabsatay ayey ku tiri, "Aboowe Macaan Wa xaan ka Codsanayaa inaad i fasaxdid indhih iisa mar kaliya kama aysan libiqsan wajigee da intii ay hadleysay oo dhan. Si aad ah ay uu u dhuuxay Hadaladeedii, Codsigeediina wu u ka gareystay. Waxuu ku yiri, "Faatma, Haddeey noo suurtoobi weyday S dii aynu rabnay Goormaan ka dhiganaa Kulankeena Danbe?."

"Waxaan ka dhiganeynaa Markii ay Hooyo Baxdo, Anigaana Kula Socodsiinaya ama adiga i soo kormeer Laba Maalmood Ka dib,"

Middaas Waa la iiga Roon yahay ee bal ii sug "Intuu Gacanta Jeebka la aaday ayuu kala soo baxay Warqad ugu Jirtay Shaatiga jeebkiisa Kore, Waxuuna u qoray Taleefankii sii, Isagoo ku yiri i soo dir markii ay Hooyo baxdo, Waqtiyadda ku aadan Tobanka Subax nimo Gacaliso Sidaas Iyo Habeen Wanaagsan."

Sidii ay rabtay Habeenkaas uma aysan Noqonin Farxadii ay wiilka u qabtay Ayaa Dhinac ka burburtay, iyadoo ay u sabab aheyd Hooyadeed. Habeenkaas Ma aysan Jecleyn iney Guriga Waqti dhaw Ku soo Laabato, Waxayna Rabtay inay in ka badan oo ay ku kala xiiso bogtaan. Waxay Soo Xasuusatay Iney Heli Doonto Waqti Fara Badan oo ay xor u tahay la Joogistiisa.



QAYBTII SADDEXAAD

Xaajiyo Binti waxay timid wadanka sacuudi arabiya, garoonka Diyaaradaha ayey tagsi ka kiraysatay geeya guriga walaalkeed. In cabaar ah markii uu waday ayuu geeyay meeshii ay rabtay. markii ay timid guriga waxaykala kulantay soo dhawayn heer sare ah oo loo dhammaa. Xaajiyaddu waxay u qaybisay caruurtii hadiyooyin ay uga keentay wadanka soomaaliya, kadibna waxay jeclayd in wax looga sheego xaalad da uu ku sugan yahay walaalkeed, waxayna is lamarkiiba kawar heshay inuu sidii hore kafiican yahay saakaytana uu shaqo tagay. Markii ay maqashay wuu caafimaad qabaa aad ayay u faraxday.

Iyadoo ku dhex jirta qolkii loogu talo galay oo ahaa mid qaabkiisu aad u qurux badanaa, ayaa goor barqo nimo ah waxay kakulantay walaalkeed oo taleefoon loo diray. Markii ay aragtay muuqaalkiisii ayay is celin kari wayday, kursigii ay ku fadhiday ayaykasoo booday jacayl ay u qabto dartiis. Salaan dabadeed waxay kuwada fadhiisteen kuraas agtooda tiilay. Muuqal kiisu marnaba uma uusan ekayn nin jiranee wuxuu u ekaa nin xayi ah. wuxuu u sheegay iney jiradu jirto laakiin takhaatiir fara badan ay i caawiyeen, haddana uu caafimaad kaygu wanaagsanyahay boqolkiiba boqol.

Goor ay casarkii tahay xaajiyaddu waxay ku soo noqotay wayso qaad,waxayna u soo soc otay qolkeedii si ay Salaada casar isaga bi xiso,waxayna aragtay walaalkeed oo ku fadhi yay kuraas tiilay barsadda,hortiisana uu ya alay miis uu dul saarnaa tarmuus iyo bakeeri yaal.Intay u soo dhaqaaqday xaggiisii ayay-ku fariisatay kursi dhiniciisa yaalay oo banaanaa;waxayna lasocodsiisay iney jeesha hay iney mar dhaw ku laabato Soomaaliya oo ay doonayso inay Dukaamanka wax kasoo iib-sato.

- Gaarigiisa inuu ku qaadi doono ayuu u sheegay oo meeshii ay rabto uu ku geyn doo-no.Wuxuuse kacdsaday iney soo dhakhsato wa khtigana ay ilaaliso,maadaama uu dhawyahay waqtigii Dukaamanka laxiri lahaa.

Markii ay dhex gashay gaarigii gudihii sii aad ayey ula dhaxday qurxoonaantiisa - iyo siduu u shaqxan yahay,waxayna walaalk-eed waydiisay goortuu gaarigan gatay.

"Shirkadda aan u shaqeeyo ayaa ii ga-day,maadaama aan muddo fara badan u shaqayn ayay,waxayna kaloo ingu dartay guri weyn oo shirkadda gudaheeda layga siiyay.Intuu yara aamusay ayuu u raacshay"Walaal,waxaad iiga warantaa arimaha reerka siduu yahay maadaa mar hore ay iigu danbaysay."

"Waxaanu wada noolnahay gabadhaydii oo aan caruur dhan kafiirsanayay,ilaahay ha ii dhaafee iyo mid adeegto ah ."



"Intuu hadalkii kasoo dhexgalay ayuu-yiri" aad ayaan uga xumahay muuqaalkeeda inaadan sheegi karin ,mar kaliya ma aanan soo booqan oo haddii ay ay hortaada taag ana tahay aadan soo qabankarin,sababtana adigaa iska leh iyadoo hadalkeedii sii wadata ayayu sii raacisay"Gabadhii waa ay weynaatay oo labaatankii bilo ay a u wah eliya. Waqtigii Guurka ku haboonaa ayey fooda la gashay, waxayna Sanadkan dhigan eysay Fasalkii Afraad ee Dugsiga Sare, & Anigoo jecel ineey imtixaanka kama danbe ysta ah ku guuleeysan doonto."Intaas Mar kii ay marinaysay ayaa la soo gaaray suu qii ay u socdeen siiba Dukaamanka lagu i iibiyo Dahabka. Waxay Xaajiyadu soo Gada tay alaabooyinkii aay u baahneyd oo dhan ka soo noqoshadii Suuqa. Waxay wada aaden Xagii Guryihii markii iney labadooda oo kaliya noqdaan maadaama uu u yahay arin muhiim ah oo uu rabay inuu kala hadlo.wa-WalaalWaxay Makay tahay Arintaasu?" ayey la soo booday, Markii ay Sheekada isla s soo horfadhisteen.

Waqtigan La joogo Gabadhii hadeey G Gaartay Xiligii Baaluqnimadda soow ma ha boona inaan nin ku darno Intii aysan noq onin kuwa suuqa ka qaraabta." Waxaa Jira Nin Saaxiibkey ah muddo fara badana aan isku meel kuwada nooleeyn, Lehna Dabeecad

Wanaagsan oo mar hore i Weeydiistay Gabadhaada. Waxaa Jirtay in mar sii horeeysay uu alaab kuugu soo dhiibay Xaaji Macalow isagoo yiri "Xaajiyadda Ha loo Geeyo." - Ma4aha Nin Naag kale Qaba Waxuuna Jecel yahay Ruux Nadiif ah oo ay Mustaqbal kuwa da Noolaadaan, Haddii uu ilaahay Ka raali Noqdo. Waxaa kaloo u sii dheer isagoo leh Hanti Fara Badan.

Xaajiyo Binti, Intii uu walaalkeed la hadlayay waxay si fiican u dh xeysay Ra'yiga uu u soo jeediyay. Waxay la noqot ay Mid macquul ah. Dhinaca Kale ayey u fiirisay Waxayna la noqotay ineysan Walaalkeed ka soo horjeesan oo ay ku raacdo Arinta u u soo bandhigay, Waxayna Ku tiri, "Uma diidani Ninka aad sheegeyso, Laakiin waa inuu ahaadaa Nin Fiican oo gabadha ii dhaqaaleyn kara, Aniguna aan aad ugu Farxo

Faatma Waxay Fadhidaa Kursi u yaalay Qolkeeda. Maskaxdeedu wey Maqan tahay. Fikir dheer ayey ku dhexjirtaa, Mana Taqaano meesha laga heysto. Waxay is weeydiisaa waxa ka maqan Muxuuse Yahay ? Intey kursigii ku fadhin weyday ayey ka soo kacday oo waxay biloowday iney qolkeeda ku dhex meeyreysato. Markii Danbe Waxay Maqashay dhawaaqa Taleefonka, Waxayna soo aaday xagiisii. Intey soo socotay ayey is laheyd



tolow yuu yahay qofkan,ma mid aad taqaanidbaa?,mise waa qof kale.Kolkii ay talefoonkii kor u qaaday oo ay tiri"Halow,waana kuma?" waxay ka dhex maqashay cod dheer oo leh"walaal guriga xaaji ciise miyaa?"

"Walaal ma ahan ee waa guri kale",ayay cod naxariis leh ugu jawaabtay.

"Waad mahadasan tahay?"ayay gabadhii u ugu siiraacisay?

"Adaa mudan.ayay ku tiri."

Markii ay taleefankii sii dhigaysay ayay indheheedu qabteenwaraaq yar oo dul saar aneyd miiska uu taleefanku saarnaa.Waxaa ku qornaa tel.009888,kor ayay u soo qaaday oo mar labaad sifiican u fiirisay,waxayna is waydiisay waraaqdan meesha ay ka soo gashay walow aysan farteeda ahayn,"Armay adeegtada iska leedahay".Hadana waxay niyada iska tiri "middaas yaa siina lambar talefoon?,xasuus gaaban ayay dib isgu noqotay oo maskaxdeeda ayay ka shaqaysiisay,nasiib wanaagse waxay heshay meeshii ay katimid,
waxay ku soo noqotay taleefankii,si deg degsiinyo leh ayay u dirtay,waxaa ka qabtay Saadiq oo hurdo kasoo kacay,waxayna ogaatay iney daraadii maskaxdeedu u maqneyd,kolkaas ey ku tiri,"Ilaah mahadii waaye,haddii aan taleefanka kuwada kulanay oo aanad dibadda ku maqnayn"ee Saadiqow waxaan kula socodsii nayaainey hooyo baxday.Midda kale waxay tahay ee aan kaacodsanayaa inaad caawa guriga kacasuumantahay iyo halka saac,kugumana oge yn nin balanta kabaxa ee waqtiga inoo wada

ilaali gacaliye."

injuu hadalkii kasoo dhexgalayayuu yiri "sow mafiicnayn gacáliso inaad marhore ila socodsiisid,si aan uga sii tabaabbshaysto, laakiin wax mashaakil ah majirto,hadii aad casumaad igu kadisay".Jaaw xabiibiayuu yiri iyaduna waxay usii raacisay"Gacaliye imaan sho wacan".

Habeenkaas guriga firaaqo ayuu ahaa,- Faatmakaligeed ayaa joogtay,waxay soo wada galeen gurigii iyadoo Saadiq kasoo horaysa una soo wada qolka fadhiga.Waxay wada fadh isteen kuraasta fadhiga midka ugu dheeraa, labadooda garab way isku dhawaayeen,gacan- tiisana waxay ku haysay mideeda,waxayna Fa atma kutiri"Saadiqow minanka minankaada - waaye ee hays martiyeynin."

Waad mahadsan tahay xabiibi ayuu ku - yiri".

Niyadiisu waxay ku maqneyd qolka uu - ku dhex jiro siduu u sharaxnaa,maskaxdiisu na waxay xisaabineysay inta shay ee ku jir ta qolka fadhiga.Derbiyada waxaa ku wada - sharaxnaa sawiro Faatma iyo hooyadeed u badnaayeen,Daahyo kala nooc ah,Geeso xaal aad,dhanka kale waxaa yaalay qaboojiye heer sare ah iyo fiidiyow aanu waligiis ku ar- kin magaalada,

intii uu ku dhaygagsanaa ayay Faatma ku ti ri,"Saadiqow maxaa kugu dhacay ood u maqan tahay?".Ma anigoo kula jooga ayaad meel ka le ka fakaraysaa"?.



"Gacaliso sidaas ma ahanee waxaan kufakarayay oo aan garan la'ahay furihii qolkayga meeshii uigu danbaysay oo aan- dhigay Faatmaay si kale ha u qaadanin, isagoo wajigeeda fiirinaya intay istaag tay ayay aaday qaboojiye u muuqday oo- furtay kasoo bixisay labo gasacadood oo faanto ah iyo saxan ay kujiraan cunto kh afiifa.Dareenka Faatma ma uusan ka dheer ayn xagga Saadiq,maadaama ay u haysatay la'aantiis inaysan noolaan karin,waxayna niyadda iska leedahay"Ilaaheey wuu iga - aqbalay ducadaeydii",oo ahayd inaan helo wiil dabeecad wanaagsan oo aan kuwada no olaano nolol aayatiin leh.

Sheekadii ayaa isugu baxaday,oo in tay u soo dhawaatay ayey dhexda ka qabsa tay,waxayna ku tiri,"Saadiqow;caawa waxa an rabaa inaan kuusoo bandhigo arrin wayn oo ah inaan yeelano xiriir qoto dheer oo aan sahl guurin,si aan u gaarno aayatiin wacan".Saadiq isagoo muujinaya kalgacalka uu u qabo ayuu gacantiisa garabkeeda saa ray,wuxuuna ku yiri,"Gacaliso,aad ayaad u mahadsantahay sidii wacneyd ee aad gur igaaga iigu soo dhawaysay,waxaana kaloo kugu amaanayaa sida geesinimada leh ee - aad iigu soo bandhigtay ra'yigaaga,anna waxaan ku leeyahay aqbalaad wacan."

Qolkii waxaa si kadis ah ku soo gal ay adeegtadii guriga oo iska heesaysa,iya doo is mar maroojinaysa.

Faatma aad ayay uga naxday,walow aysan meesha kafilaneyn inuusan cawadaas oo kale aysan lakulmayn qofsaddexeeye ah,naxdin dar teed ayay kala boodeen oo waxay adeegtadii ku tiri,"kabax qolka oo mar danbe hanoo soo galin saqajaamad yahay".

Labadoodii Faatma iyo Saadiq waxay wada galeen habeenkaa axdi adag oo ruuxna uusan kabixi karin,haddii ay wax kasta dhacaan. waxa kale oo ay iska dhaadhiciyeen iney jir aan dad isku diraale ah oo ka dhex shaqeeya labadii is doorta,rabaana iney kala dilaan in leeys ka ilaaliyana haboonyahay,ruux walbana tiirka jacaylka uu dhiniciisa kailaa liyo.

"Gacaliye,maadaama la gaaray wa .ti da nbe,goormay ku haboontahay inenu kadhigano kulanka danbe?"Iyadoo haraagii gasacadii fa antada aheyd ugu shubaysa bakeerigii agyiilay.

"Waxaan jeclaan lahaa inaanu kadhigano habeenka jimcaha ah,sababtoo ah habeenadan waxaan ku noqonayaa shaqadii iyadoo uu soo dhawyahay xisaab xirkii sanadka."

"Gacaliye,waqtigaas soo madheera?"Iyadoo cod naxariis ku tiri"waxba ha ka wal walin intii laga gaarayo habeenkaas waxaan is kala xariiraynaa talefoonka?"Xasuus gaaban ayuu dib isugu noqday wuxuuna ogaaday inuu lajoogo wehelkii qalbigiisa ,Gurigii ayeyna kasoo baxeen.Faatma waxay jeclayd iney xaaf adda kasii bixiso,laakiin wuu kadiiday,wuxuuna ku yiri,"Orod waqti danbe ayaa lajooga aye."



Kasoo noqoshadii Saadiq,waxay aragtay adeegto Asli oo fadhiday barsada,intey u soo dhaqaaqday xaggeedii ayey ag fadhiisa tay kursi dhinaceeda yaalay,iyadoo rabtay iney ogaato meesha ay katimid ,waxayna ku tiri,"Asliyeey waqtigan xageed katimid?",

"Magaalada ayaan ka imid oo alaabooyin kasoo iibsanayay."

"Yuu ahaa wiilkii aad la taagneyd af ar irdoodka,siiba Dukaamanka hortooda lagu iibiyo cilaanka."

"Wiilkaas abaayo macaan waa kii aan kaaga sheekayn jiray,mar dhawna waxaan ku talo jirnaa inaan isguursano".

"Hadaba;wiilkii aad caawa arkaysay - waan is jecelahay,sidii aad doonaysaan ka daran ayaan rabaa ee bal kawaran".

"Hooyadaa markii ay joogtay ma aadan samayn jirin waxyaabahaas ee hadda maxaa kugu kalifay?"

"Guriga ma adigaa iskaleh,mise anagaa iskaleh?"ayay si kulul u tiri. Afarahaas kabax ayaan ku leeyahay,haddii aad kabixi waydidna iska jir guriga ayaan kaa cayrina yaaye.Asli intay xanaaqday ayey fadhigii kasoo istaagtay,waxay samayso ayey garan wayday,kolkii danbana waxay ku carartay - qolkeedii oo intey gashay ayay gudaha kaso xirtay.

## QAYBTII AFRAAD

Waqtigii ay balanta lahayd ayaa lagaar ay, goor hore ayey is diyaarisay. habeenkaas waxay ku tala gashay in wada kulankoodu uu u dhaco mid kaxiisa badan kuwii ka horeeyay sidii caadad u ahaan jirtay waxay soo abaar tay wadadii aadi jirtay goobtii balata ay - ku lahayd markii ay timid waxay lakulantay meeshii ao cidla ah, waxayna niyada iska tiri "Gacaliyeheyga waa inaan sugaa ilaa uu iiga imaanayo."

"Dabayl siigo wadata ayaa habeenkaas dhacaysay, walow aysan dareemayn fadhigii ay ay kasoo kacday oo waxay damacday iney geesa ha kasoo fiiriso, nasiib ximase way kasoo way day. Iyadoo iska quusatay ayay ogaatay inuu waqtigu uu toban daqiiqo dhaafay laakiin wa xba lama aysan ahayn, waxayna kusoo noqotay booskii ay fadhiday. Mar danbe waxay dareent ay in dhabarkeedii gacan qaboobi taabatay, naxdin ayay la soo booday oo waxay ku sigatay iney meeshaba ka cararto laakiin soo jee sadkeedii waxay aragtay Saadiq oo gadaashee da taagan Intey is heyn kari weyday ayey salaan kula soo booday, Isaguna Si wacan ayuu uga qaaday, Waxyna Ku tiri, "Gacaliye, waan cabsanayay intii aad iga maqneyd".

Markii aad timid ilaa waqtigan waan jo ogay oo waxaan la socday xarakaadka aad sameyneysay, Waxaanan ugu talo galay inaan ogaado inaad ii dulqaadaneysid haddii aan kaa soo daahi lahaa iyo in kale".



"Gacaliye sidee bey ku dhici kartaa inaan kuu dul qaadan waayo sow ma ogid ina ad tahay wadnaheyga barkiis." Intey Gacanti isa soo qabatay ayey taabsiisay wadnaheeda.

Waxuu dareemay in xoowliga uu ku shaq eeyo uusan caadi ahayn, Wuxuuna ku yiri wa xaan ku weeydiinayaa inaad ii sheegto sidey wax u jiraan iyadoo dhab ah, Maadaama aan wax kala qarsaneyn."

"I su'aal Gacaliye aan kuu jawaabee".

"Wadnaha Miyaad ka jiran tahay, Mise sidaana shaqadiisa ah ?" Haddii aan runta kuu sheego, Beentana ka dheeraado jiradu wey jirtaa, Laakiin ditoorkii daaweyn lahaa ayaa la rabaa".

"Midaas mashaakil ma lahan oo waxaan tageynaa barito ditoorada ku soo takhasusay baarista wadnaha, Waxii daawo oo ay kuu soo qoraan yaad isticmaaleysaa."

"Ditooradaas Horaan uga soo daalay oo wey i daweyn kari waayeen ditoorka runta a hna waa adiga xabiibi."

"Sidee baan ku noqon karaa! Waligeyba ma aanan tagin meel lagu barto culuuntaas."

"Gacaliye, Markii aad guriga tagtid oo aad sariirta ku jiiftid ka fakar sidii aad datoor iigu noqon lahayd"

Xasuus yar dabadeed waxuu la soo booday, Xabiibi haddii aysan na soo dhexgalin dadkii jaceylka lidiga ku ahaa, Waa inoo u hagaageysaa natiijadda aan rabno, Daawadana waa la helaaya ee ku bishaareyso.

Faatma waxay gacaliyaheeda ka codsatay iney soo lugo baxsadaan si ay indhaha ugu soo raaxeeyaan, U soo dhaqaaqidii magaalada markii ay hormarayeen Shaneemo Shentaraale ayay arkeen tabeelihii oo dad badan kor tuban yihiin , Saadiq oo aad u jeclaa Filimada ayaa Gacaladiisii ka codsaday iney xoog aa yar halkan ku sii sugto, Waxuu soo aaday xagii tabeelihii, Waxuuna indhaha ku dhuft ay inuu ka socdo filim aad u fiican oo ka sheekeynaya labo dhalinyaro ah oo dhexmaray Jaceyl iyagoo isla dhigta Jaamacad.

Ka soo Noqoshadii waxuu u yimid Faatma oo halkeedii Taagan, Waxuuna Niyada Gashaday Iney hadalkiisii Yeeshay, Taana ay Markhaati cad ka tahay jaceylka ay u qabto, Waxuuna u sheegay tabeelihii waxii uu ku soo arkay.

Waxay la socodsiisay iney galayaan, Maadaama ay Habeenadan Filim daawanin.

Codsigii ayuu ka aqbalay, Waxuuna ku yiri "Intii ay dadka kala sii yaraanayeen ina keen aan baararkan wax ka soo cabnee."

Waxay u soo dhaqaaqeen dhinaca Baar beermuuda oo xoogaa u jiray halkaasoo ay ka qabsadeen Cabitaan heer sare ah iyo Cunto Khafiif ah, Ka dibna waxay yimaadeen Filimkii .



Markii ay soo galeen Gudaha waxay arkeen in kuraasta oo dhan ay wada buuxaan, Iyadoo aad loo xiiseynayay filimkaa Habeenkaas Socday, Lahaana qiso aad u macaan Iyo Midab aad u qurux badan.

Kolkii ay Shan Daqiiqo istaagnaayeen ayuu Saadiq arkay laba boos oo laga sii Kacayo, Si dhaqso ah ayuu ku haleelay kuraastii banaaneyd, Waxuuna u wacay Faatma oo taagneyd meel in u jirta.

Halkaasoo ay filimkii ku daawadeen la akiin waxaa uga sii wanaagsanaa sheekadda oo habeenkaas aad ugu baxaysay.

Dhmaadkii Filimka waxay soo wada aaden Guriga Faatma iyagoo wada istaagay Horaan tiisa, Waxayna ku tiri"Gacaliyoow Caawa Waxaan jeclaan lahaa inaad ila joogtid ilaa waqti danbe maadaama Joogistaadu ay ii tahay Wehel."

"Waqti Danbe ayaa la joogaa ee Orod iska hoyo Xabiibi, Anigana Barito shaqaa la yga Rabaa." Gacanteeda intuu soo Qabtay ayuu waxuu la soo aaday Gurigeedii, Waxuuna ku yiri "Gacaliso Waqtigee Ayaad Jeceshaha hay inaan is aragno?.

"Waqti walba waxaan jeclaan lahaa inaan ku arko si aan laabta ugu sifeysto hadd ii ay ii suurtoobeyso, Waxaynu ka dhiganeynaa habeenka Jimcaha ah Hadii uu ilahay na gaarsiiyo " Iyadoo sii Qosleysa ,

"Xabiibi Habeen Wanaagsan Ayuu sii raacshay".

Saadiq Gurigiisii ayuu yimid isagoo Habeenkaas aad u faraxsanaa ayna uga Duwaneyd habeenadii kale, Maadaama ay Xabiibtiisii kala soo tageen Waqti Danbe, Qolkiisii ayuu soo galay oo waxuu abaaray Sariirtiisii isagoo aad u maqsuudsan, Raaxo Macaana la soo hoyday Waxuu jeclaa inuu soo xasuusto waxyabihii u soo maray maanta, Waxaana Maskaxdiisii ka soo Go'i weyday, La kulankii Gacaladiisa Qaaliga aheyd, Waxuuna Niyadda iska yiri "Waxaan Rajeynayaa inaan arrinta aan isku ognahay labadeena inaan ku guuleysan doono, Ma filayo Ilaahay Mooyee Qof kale muusan nakala reebi karin, Waxaana Markhaati cad ka ah Jaceylka aan isu qabno labadeena iyo halka uu hadda marayo, Ma jecli ruux jaceyl hayo in lagu Saqajaamo, Madaama aan aqoon fiican u leeyahay, ereyga Jaceyl iyo waxyaabaha uu isugu soo urumray, Had iyo Goor waxaan jeclahay inaan Naxariis u sameeyo Nafsadii Jaceyl U ooman, Waxaana ku dadaalaa sidii ay haraadka [illegible] Haya uga bixi lahayd.

Subaxnimadii waxaa u bilaabatay Hoowshiisii isagoo xataa galabtii ku noqon jiray maalmaha qaarkood, Waxaa Maskaxdiisa ku Sawirmi jiray muuqaalkii Faatma, Laakiin waxuu isku maaweelin jiray kulankooda inuu caadi u yahay intii laga gaarayana uu iska sii ad keysto .



Sidii caada u ahaan jirtay xawaxaadiisa Saadiq waxaa lakeenay xaafadiisii wuxuuna abaaray girigiisii,markii uu qubaystay ay uu u fariistay qado,kadibna wuu seexday, isagoo isku sii madadaalinaaya Buug saykoloji ah(psycology).Hurdadii ayaa latagtay goor danbe ayuu kasoo kacay iyadoo ay dul taagan tahay gabadhii guriga iska lahayd oo ku leh"Saadiqow galabta intii aad hurdaysay oo dhan taleefoon ayaa kuu soo noqnoqonayay,hadana wuu yaalaa;"Wuu u soo cararay halkii uu yaalay intuu kor u qaaday ayuu ku yiri"halow,waakuma?" cod macaan oo dhagihiisa soo gaarayay ayuu markiiba gartay,waxayna kuyiri,"xabiibi kawaran ca afimaadkaaga?".

"Sidaada oo kale ayaan ahay",ayadoo qosol macaan qososhay,waxayna u sii raabisay"Gacaliye waan lasocdaa in hurdo lagaa soo kiciyay,mana jeclayn ee iga raali ahaw" iyadoo sii wadata ayaytiri"waxaan rabay inaan kula socodsiiyo barnaamijkii aan ca awa qaban lahay ee guriga igu sug".

"Waad mahadsantahay ayuu ku yiri".

Midda ugu daran waxay ahayd isagoon habeenkaas haysan dhar aad u qurux badan oo uu saaxiibadiis ku raaco,goor walbana wuxuu jeclaa inuu soo xirto dharka ugu wanaagsan magaalada,laakiin tabartaa udiiday wuxuuna niyadda iska yiri,"Haddii aad dad aasho waad iska qayraysaa".

Midda kale ee dhibaatada ku haysay waxay ahayd, isagoo dhaqaale uu xabiibtiisa baararka waaweyn uu ku geeyo aan haysan.

Dharkeedii kuwii ugu qurux badnaa ayay soo xiratay, waxay dul timid armaajadeedii oo ay uga buuxeen waxyaabaha ay Dumarku isku qurxiyaan, iyadoo jeclayd inay habeenkaa sifiican isu qurxiso, maadaama ay u socotay gacaliyaheeda qaaliga ahaay, waxaana caado u ahaan jirtay markii ay labisanayso iney Rikoorka shidato hees macaan oo aan labiska ka qaldin, si qumaati ah ayey isu soo saxday, garabka waxaa u surneyd boorso madoobeeyd oo ay ku dhex jiraan masawirkeeda oo ay ugu soo talo gashay iney xabiibkeeda gudoonsiiso iyo-xoogaa lacag ah oo ay habeenkaas ugu talo gashay iney ku soo tamashlayso, waxayna habeenkaas u hanwaynaydiney Saadiq soo qanciso, kalana dooransiiso meeshuu magaalada ka rabo

Hooyadeed waxay uga tagtay labo Baabuur mid suuqa ayaa looga soo adeegi jiray, kan kalana iyadaa ku socon jirtay. Habeenkaa waxaa niqor shaysnaa inaan qaato131, laakiin markii aan ku arkay cilado matoorka ayaan iska dhaafay. Waxaan soo qaatay maarsheediiska oo habeenkaas muuqaalkiisu icajaa'ib galiyay, waxaana i deeqday siduu gudahiisu u sharaxnaa iyo udgoonka kasoo baxayay, waxaan soo ag istaagay-agtiisa anigoo dhinacyadiisa fiirinaya ayaan niyadda iska iri "Walee gabar nasiib leh ayaa wadata kan oo kale".



Albaabka ayaan iska furay, oo gudahaan u talaabay, furahiina ku suray. Intii aanan dhaqaaq bilaabin ayaan soo qabsaday boorsade ydiioo dhinacega taalay, waxaana kalasoo baxay baakad xanjo ah, cajlad ay ku duubneyd miyuusig diiran ayaan galiyay rikoorka Baabuurka, suunkii baabuurka ayaan dhexda iska giijiyay kolkaasaan socod kaygii bilaabay, anigoo socodkaygu uu kabad neyn 25 laa 40km, waxaana soo abaaray wadadii aadi jirtay guriga Saadiq.

Habeenku waa jimco, saxada magaaladuna meel dhexaad ayay ahayd neecaw carfoon ayaa dhacaysay, cirkuna midabo kala jaad ah ay uu lahaa; saadaashuna waxay u ekayd roob, waxaana dareemayay macaan iyo farxad isku dhafan oo aan waligeed maskaxdayda kaguurayn kana baaba'ayn intii ay nooshahay. Waxay soo ag istaagtay guriga saadiq, halkaasoo ku aadaneyd dariishadiisa ayay hoonka gaariga yeerisay, balse Saadiq oo sugayay ayaa madaxa dariisha kala soo baxay, kuna yiri, "Diyaar baan ahay, waana soo dagayaa".

Caawa waxaan nasiib u yeeshay iney xabiibtayda qaaliga ah ay igu wado baabuur aad u qurux badan. Intuu dhoola cadeeyay ayuu sii raacshay, "xabiib y iska leh gaarigan quruxda badan?."

"Gaarigan aad arkaysid hooyadeey ayaa iiga tagtay, markii ay joogtayna iyadaa isticmaali jirtay".

"Haddii aan kaaga waramo Dabeecadaada aad ayay u wanaagsan tahay, Gabdhahii aan soo bartay oo dhana asluub wanaagaada wax

kula mid ah kuma aanan arkin,waana midda aan kaaga soo dhex doortay,adigaana aad iiga qancinyay."

"Gacaliye,amaanta badan maad iga kala - daaysid,yaanan kala badanine.Waxaad tahay 'kii waxaan ifka ku arkin uurkayga ku beeray buugiisiina aad macalin iiga noqotay".

"Xabiibi xaggeen u socnaa caawa?,"isa goo xabad sigaar ah jeebka kala soo baxaya ayuu ku yiri.

"Mabarnaamij ayaad leedahay?",ayay ku tiri,iyadoo baabuurkii inyar hakisay.

"Maya"

"Caawa waxaan jeclaan lahaa inaan dukaamanka dharka aadno si aan dhar uga soo iibsado,adigana aad i wehelisid".Waxay cagta u saartay baabuurkii wada aada Maka al Mukarama."

Markii ay maraysay shaqaalaha ayay baabuurkii hakisay,waxayna u soo dhawaysay - meel ku aadanayd xalwo xaaji Ciise,halkaasoo lahayd boos banaan oo baabuurka ladhigan karay.Habeenkaas isgooyska waxaa buuxay dadsugayay baabuur ay raacaan.

Siwadajir ayay u galeen Dukaankii ugu soo sokeeyay,kaasoo ahaa mid aad u camirnaa,ayna u dhamaayeen waxyaabihii loo baahnaa oo dhan.ha u sii badnaadeen dharka dumarka waloow ay yaaleen kuwa ragga iyo alaabooyinka ay dumarku isku qurxiyaan.

Ugu horayntii waxay Faatma wiilkii dukaanka gadayay ka codsatay inuu u soo dajiyo goonada jiiniska ah iyo shaatigeeda, iyadoo aad ula dhacday iyo barafuuno kala nood ah.Waxay gacaliyaheeda kacodsatay - inuu,,fiiriyo sida ay ku tahay.

Wuxuu kuyiri"xabiibi aad ayaad ugu - fiican tahay,' Waxaana lamoodaa iney wars hadu adiga kuugu soo talo gashay".

intey wiilkii dukaanka gadayay u soo noqotay ayey marlabaad ku tiri,"Walaal waxaad soo dajisaa jaakada madawga ah iyo dharkeeda oo iswata."iyadoo gacanta ugu tilmaamaysa.

Saadiq oo aan kadheerayn ayaa hoos - ahaan u yiri,"Xabiibi,yaad u gadaysaa?"- dharkan tirada badan.

Intey dhegtiisa afkeeda u soo dhawaysay ayay ku tiri,"adigaa iskaleh ee ina - keen aan markaaga kula soo fiiriyee."

Wajigiisa waxaa ka muuqday inuusan raali ka ahayn dharkay u gadayso Faatma, maadaa aysan markii hore lasocsiinin,waxayna diidmadaasu dhibaysay ninkii dukaanka lahaa,intuu ishayn kari waayay ayuu Saadiq ku yiri,"Walaal saw xaaskaada ma aha"?haddalkeeda waligaa hadiidin,hana iska soo hor jeesanina dukaanka dhexdiisa,ee orodoo ga badha raac,anigana aan dharka idinka iibiyee".Intey gacanta soo qabatay ayay ku tiri"Gacaliye,inaga dhaqso ee orod iska soo fiiri inuu isteelaha kuu saxan yahay."

Markuu gudaha galay ayuu wuxuu ogaaday inuu ku fiican yahay,laakiin uusan waligiis gashanin dharkan oo kale.Muddo badan ayuu ku riyoon jiray isagoo aad u soo

labistay,magaaladana ku dhex meeraysanaya qolkii yaraa dhexdiisa ayaa waxaa uga bila abatay farxad,aan laqiyaasi karin,isagoo - dhidid fara badan uu dhulka uga daatay. Markii danbe wuxuu u yeeray xabiibtiisa si ay u ogaato siduu kuyahay,waxayna aad u la dhacday siduu dharka ugu fadhiyo,niyada na waxay iska tiri"Walee sharaxaada wali - way kuu dhiman tahay,hadii aan isla noolah ay.Faatma waxay wada bixisay kharashkii dh arka oo dhan,iyadoo cadadkii ay rabtay ka-yaraysay markii uu ula hadlay xabiibkeeda qaaliga ah.Waxay soo aadeen halkii uu baab uurku u yaalay,ruux walbana isagoo gacanta uu ku wato bac ay kabuuxaan dhar.

Faatma waxay baabuurkii afka u saartay wad adii ay awal hore ku yimaadeen.Markii ay - hormarayeen Hotel Maka al Mukarama ayay jo ojisay,waxayna gacaliyaheeda ka codsatay intii aysan soo dagin iney xagaa ku soo la yrsadaan,siwadajir ah ayay u soo galeen hu telkii,waxayna tageen beertii qurxda badn eyd halkaasoo soorihii ay kadalbadeen casho isku nood ah iyo caana geel.Intii ay jidka kusoo socdeen ayuu gacaladiisa waydiiyay-ladagtan tirada badan sababta ay u kharash garaysay.

Sifudud ayay ugu jawaabtay,"kharashka aad arkaysid waxaa iga keenay xubiga aan kuu - qabo awgiis."



Habeenkaas wixii magaalada afarteeda gees latagaba,Saadiq markii danbe waxaa la keenany gurigiisa isagoo maqsuud ah.markii ay is mcasalaamayn lahaayeen,ayay qaanada baabuurka kasoo bixisay baqshada gaduudan waxayna ku tiri,"intii aad guriga katagay sid ha urin".kalkiina ayey ku kala tageen.

wuxuu soo abaaray gurigii,markii uu soo galay wuxuu indhaha ku dhuftay ciddii dariska ahayd oo talefishinkooda daawanayay Intuu gees kamaray ayuu qolkii dalaq yiri, albaabkiina hoosta kasoo xirtay.

In tuusan waraaqda furin waxaa niyadi isa ku jirtay shacuur isugu jirtay farxad iyo baqdin,habeenkaasna waxay u ahayd hab eenkii ugu wanaagsanaa intuu ifka ku noolaa wuxuu nafsada ku lahaa,"Tolow waraaqdan ma xay tahay?"mawaraaq ay ii soo qortay oo ay iiga waramayso mustaqbalkeena miyaa?"lacag haday tahay may intaan le'ekaan lahayd. wuxuu garan waayay meel uu maskaxdiisa ku hagaajiyo.

Wuxuu garwaaqsaday inuu sariirta lata go,aysan ku haboonayn inuu meelkale ku akh riyo hadii ay waraaq noqoto.Furitaankeedii intuu ku dhaqaaqay ayaa waraaqdii waxaa ku soo dhacay dhibic dhididkiisa kamid aheyd, gacmihiisiina waxay awoodi kari waayeen in ey si qumaati ah waraaqdii u qabtaan.waxaad moodaa in tamartii oo dhan laga id laystay Sidaas ku ma uusan dhaafine intuu is adkee yay ayuu hoosta kayiri"Illaahoow amuuraha ii sahal".Baqshadii oo sariirta dhineceeda ta

alat ayuu soo qabsaday, geeska hore kajeex ay, waxayna in dhihiisu qabteen waraaq yar oo dhulka ku dhacday. Markii uu soo qabtay na wuxuu arkay inuu magaciisu ku qoranyah ay, markii uu si qumaati ah u fiiriyay wux uu arkay xisaab lacageed oo dhan 200,000-sh.so. Jiifkii uu ku akhriyay ayuu kadoo - booday oo dhuka yimid, waxayna lanoqotay inuu riyo ku jiro, cabaar markii uu maskax diisa dajiyay ayuu ogaaday iney dhabtahay Qalbiga ayuu iska yiri, "Waligeey tanoo ka le farahayga masoo galin, mahaduna ilaahay ayay u sugnaatay".

## QEYBTA SHANAAD.

Xaajiya Binti waxay ka timid Jidda, Waxayna dhex joogtaa Gurigeeda, Muuqaalk eeda wax baa iska soo badelay oo intey soo cadaatay ayay Caman kuuskuusan soo bixisay una soo ekaatay Gabar yar oo Labaatan jir ah, Wajigeeda aad ayuu u ifayay oo ruuxii mar hore ugu danbeysay uusan lahayn waa - Xaajiyadii. Habeenkii ay imaaneysay waxay gashaneyd Dhar aad u qurux badnaa oo ifay-ay, Uguna Koreysay Shuko Madoobeyd. Waxaa dhuunta ugu xirnaa Dahab aad u tira Badnaa uuna dareemi karo culeyskiisa Ruuxii xirta

Guriga waxaa loo sharxay si xad dhaaf ah siiba qolka Xaajiyadda loogu talo galay oo aad uga duwanaa Qolalka Kale.



Dhulka waxaa lagu firaashay busaadyo, Isbuu nyayaal iyo barkimooyin kala nooc ah. Udgoo nka Heerka sare ah ayaa ka soo go'ayay qolka Gudihiisa. Martida Habeenkaas Waxaa loo Diy aarshay Cabitaan kala jaad ah. Guriga Xaaji yadda Waxaa Habeenkaas isugu Yimid Dad aad u tira badnaa oo dhereraysay inta ay ka ima-anaysay, Isuguna Dhefnaa Deriska Iyo Ehelada oo meel dhaw Iyo meel Dheer kawada Yimaaday Doonayana inay Fariimaha loo wado si fiican u dhuuxaan.

Martidii markii ay kala Baxeen waxaa gurigii isugu soo haray Xaajiyadda Iyo Laba da Gabdhood. Waxay Duinac Uga Fadhiyeen Go'goshii loogu Talo Galay, Waxayna uga sheeke eysay Waxyaabihii Safarkan Ugu Xiisaha Badn naa Ee aay kala Kulantay. Waxaa Qolkii si Kadis ah Ku soo Gahsay Islaan Ay Xaajiyadda is Yaqaaneen, Labadii Gabdhood Halkii ayay ku qulquleen. Islaantii Markii ay isa Sala meen, Kadibna La siiyay Wixii Loo waday. Xaajiya Binti Waxay u yeertay Gabadheedii, Markii ay u timid ayey Gudoonsiisay Hadiyad ii Quruxda Badneyd ee aay uga keentay, Waxa yna kaloo Gudoonsiisay Salaantii ay uga Sid ay Abtigeed, Markii ay Hadiyadii Aragtay Ay ey Hooyadeed Labada Dhabban ka dhunkatay ku na tiri, "Hooyo Macaan Salaamulaahi." Marka aad waraaq u direysid igu salaan, Intey Orod isku taabatay Ayey Qolkeedii Gashay .

Xaajiya Binti Waxay Ku mashquulsaneyd Cajalo oyinkii loo soo dhiibay oo aad u badnaa, Wax ay u yeertay Faatma iyadoo rabtay iney u kal a habeyso Cajalooyinka si loogu geeyo dadkii iska lahaa, Laakiin waxaa u yimid Adeegto As li, Waxayna u sheegtay inaysan Joogin oo ay jirto cidaha Dariska ah. Xaajiyadu Waxay soo xasuusatay iney Lafahaanteedaba u baahneyd, Waxayna ku tiri Shan Daqiiqo Ka bacdd ii imo

"Waa yahay ayey Tiri."Iyadoo sii Baxaysa

Markii ay u timid ayey ku tiri;" Halkan soo Fariiso." Waxayna Tustay Hadiyadii Gaark aheyd ee ay u waday, Laakiin waxay Weydiisay iney ka soo baxday Shaqadii ay isku ogaayeen waxayna u sheegtay Haddii ay shaqeysatay Ine leedahay. Waxaan kaa sugayaa inaad ii sheegt id wixii dhacay intii aan maqnaa oo dhan, Ad igoon waxba iga qarin".

Waxay u sheegtay Ineysan Gabadheeda Wa xba ka sheegi karin, Sababtoo ah Haddii aan kuu sheego Barito Ayey i dileysaa.

"Ha ka Cabsanin Anigaa Joogee Ee Bal ii Wara "

Gabadhaadu waa weynaatay oo waxay rab to ayey Sameyn Kartaa, Qof ka celin kara Ma jiro, Adiga Xataa ha ahaatee. Sababtoo ah Wa xaan arkay intii aad maqneyd iyo Waxyaabihii ay sameeyneysay. "Waxayna u sheegtay intii ay isheedu qabatay oo fool xumo aheyd.

Iyadoo Careysan Ayey Qolkii ka soo baxd ay, Waxayna Fiirisay Hooygii Baabuurta oo Gu riga dhexdiisa ku yaalay.



Waxay Ogaatay iney Baabuur La maqan tahay D Daris aadistiina laga weyn yahay. Caradii heysay Ayaa ku sii Korodhay. Oo meel ay joogto ayey Garan weyday, Waxayna is tusaaleysay Haddii ay waqtigaas heli lahayd iney Waajibkeeda Mar siin lahayd. Sugitaankii wuu ku dheeraaday, Talona Wey ku dhalatay, Waxayna Jecleyd iney Hesho Meesha ay Magaaladda kaga jirto Iyo Cidda ay isla joogaan.

Gaarigii Yaraa ayey Soo qaadatay, Iyadoo rabtay Iney Soo raadiso Xaafadda ay Degan yihiin iyo Agagaaraheeda. Nasiib xumase Waa ay ka weysay meelihii ay ku soo talo gashay oo dhan, Markii Danbe Ayey Aragtay iney dhex joogto Xaafado kale oon qorshaha ugu jirin.

Waqtigii ayaa Dib isu guray oo waxaa la gaaray xili danbe, Xaajiyadduna waa ay ka quusatay Raadintii, Waxayna iska soo aaday Guryihii. Markii ay Hormareysay Kawaanka Malayga Ayey Isha ku dhufatay Baabuurkii Oo Guri Hor yaala, Iyadoo sii Hubsaneysa Ayey Baaburkii u soo dhawaysay Midkeedii, Waxayna Ogaatay Inuu isagii Yahay. Waxay ula ekaatay inay Guriga uu Baabuurka Horyaalo ku jirto.

Gurigii ayey Si dagan asho leh ku Garaacdaya Nasiib wanaagse Waxaa Ka Furtay Gabadh Yar oo gashaneyd Dharkii Hurdada .

"Hooyo Macaan, Waxaan Rabay Gabdhii Baabuurkan Wadatay". Iaydoo Farta ugu siib tilaamaysa.

Maama ma aqaano Gabadha aad sheegeyso ee Naga Raali ahoow, Baaburkana Waxaa iska leh Ninka Dariska nala ah."

"Mahadsanid". Ayey Xaajiyadii ku tiri
"Jaaw,Maama". Ayey Gabadhii u sii Rea-
cisay.

"Xaajiyadii iyadoo Dareen Weyn ka qab
ta Guriga la yiri Kuma Jirto Ayey Isago s
soo tagtay, Waxayna soo Aaday Gurigii.Guri-
gii markii ay timid ayey Weydiisay Asli in
ay Timid, Waxayna u sheegtay Iney Wali Maq-
an tahay. Markii ay Timaado Waqti Kasta ha
noqoto si dhaqso leh ha iigu timaado. Qolk
ii ayey iska gashay iyadoo Caradii ay isu
badashay Wareer Iyo Madax Xanuun, Waxaana
u bilaabmay Iney Kaligeed Isla Hadasho.
Ma gabdhii aduunyadda oo dhan aan ka fiirs
anayay ayaa sidan isu badeshay? Alla Maxaan
ifka ugu Noolahay Bal fiiriya Saacadaa ay
iga Maqan tahay, Waxaa ku dhacay Miyaan Wa
r ka hayaa, Ima aysan sheegin meesha ay aa-
day. Armay shil gashay, Ilaahayoo Iga Sam
ata Baxi Haddey Dhacdo. Midadanaan ku fiir
sadaa soo hadhoow foolxumo iima keeneyso,
Waleey Hadday daba qabasho leedahay waa in
aan ka gaaraa. Haddii kale weyba k sii da
reysaa, Caawana Markii ay Timaado Waa inaa
n helaa Meeshay Ka timid iyo Cidey isla So-
cdeen.

Hoonk Baabuurka oo Dhawaaqiisu Laba
mar ahaa ayey Asli Maqashay Intey soo Ora-
day ayey albaabka ka furtay,Faatmana Baa-
buurkii ayey Xareysay, Waxayna u timid as-
li oo ay ku tiri "Saaxiibey Hooyo Ma hurud
aa!? Caawo oo dhan ayey Magaaladda kaa raa-



dineysay, Meel ay kaa soo dayina Ma jirto".

"Miyeey ii dhaarsan tahay" Ayey la soo
booday. "Ciilka ay kuu qabto Iyadaa garaney-
sa inta uu tiro la egyahay, Waxayna igu tiri
"Markii ay timaado waqti kastaba ha noqotee
ha ii timaado;"

Naxdintii badneyd waxay isu badashay m
uraaro dilaac, Waxayna ogeyd iney hooyadeed
waxyaabahaas ay sameysay raali ka ahayn iyo
wareega badan. Waxay is leedahay yaan caawa
u duceeyaa oo habarta iga qabta, Waqtiyo Ba
dan ayaan kareeystay dilkii badnaa, Laakiin
caawaan Cagta Kula jiraa, Waxayna Ogaatay
Haddii la dilo Iyo Haddii la Canaanto iney
isugu Mid tahay. Wax kasta Haddii ay dhaca
ana Aysan ka harayn Saadiq, Intey is Geesin
imo galisay Ayey Qolkii Xaajiyadda Dalaq soo
tiri.

Xaajiyadii oo sariirta la dul saarneyd
ciil dartii, Ayaa hal mar ka soo booday Mar
kii aay muuqaalkeeda aragtay, Waxayna ku ti-
ri " Saacadan ayaad socotaa soo mahan"?.
Intey Gacanta soo qabatay ayay Qaniinyo
kulul ku dhagtay, Markii ay qadar Daqiiqado
haysay oo ay cabaaday ayey sii deysay, Waxa-
yna ku tiri"Waxaad Keentay Inaad Xamar oo d
dhan aad ku soo wareegtid, Habeenkiina Waqt
iyadan Iyo Wixii ka danbeeya aad soo Hoyatid
Haddii aan kaa maqnahayna kaba sii daran.

Canaantii intey u cuntami weysay ayeey ma rkii danbe soo qaadatay Ul aan ka dheereyn kuna tuntay ilaa ay ka xanaaq gooyso, Waxayna kaloo ku tiri"Gabadh yahay Anigaa Kibirka kaa Badiyay ee Guriga Meel aad uga bixi kartaa Ma jirto. Aaway Wanaadii aan kaaga tagey, Mise Sidaaneey isu Badeshay.

Faatma Ereyadaas Markii ay Maqashay waxay ula Mid Noqdeen Falaar Mariid Wadata waxayna la sii ahaatay iyadoo ku sii dhac aysa Badweynta Hindiya. Waxay Ku hadsho ayey Garan Weyday, Dantuna Waxay Ku Qasab tay Iney Amusnaanta Kaashato, Waxaase Murugtii ku bilaabatay ku sii kordhiyay Markii ay Hooyadeed Kaweeyday sidii Hore . Arinta ay Hooyadeed Kala Kulantay Waxay ku abuurtay Tiiraanyo aysan Waligeec Dareemin waxayna ku qasabtay Ineey Hurdi kari weydo iyadoo dhan wey is badeshay Caradii baa ku sii Korodhay, Deganaanshihii baa ka lumay Meel u roon waa ay garan weyday.
Markii Danbe Wax ay Raadisay meel ay ku na sato. Madaama ay ku dhex jirto webwel Iyo Fikir joogta ah, Waxayna Bilaawday Iney is hilmaansiiso Mushkilooyinkan Faraha badan ee la soo darsay. Si ay u degto Waxay isku hurdiisiin jirtay Sawirka Saadiq oo ay Habeenkii si joogta ah u fiirsan jirtay.

Xaajiyadii Markii uu waaga Baryay ayay ku jarmaaday qolkii ay jiifsan jirtay adeegto Asli Sariirtii ay ku jiiftay ayey dhinac uga fariisatay, Waxayna Weydiisayiney aqoon fiican u leedahay Wiilka Guriga imaan jiray.



"Aqoon gaar ah uma lahi,laakin Haddii aan arko waan aqaan."
"Ma xaafaduu dagan yahay ? ayey la Soo booday.
"Ma aqaano,meesha uu degan yahay.
Xaajiyadii ayadoo xanaaqsan ayey qolkii Faaduma jiifan jirtay si dhaqso ah ku Soo gashay waxay tagtay miiskii ay buugaagta u saarnaayeen waxayna ku dhaqaaqday Baarid.Markii ay mudo baadi goobaysay Ayey kolkii dambe waxay heshay boorsadii Madoobayd markii ay furtayna waxay soo baxisay buugii yaraa ee xasuus qorka ahaa Buugii yaraa ayaa baarid looga dhaqaaqay Waxaana Ku qornaa gabdho badan oo ay Isku dugsi ahaayeen iyo wiilal qaraabo ahaa oo dibada waxbarasho ugu maqnaa, Laakiin baalkii ugu dambeeyey ayaa xaajiyada shaki ku abuuray,waxaana ku qornaa wiil aysan garaneynin.
Magaciisa dhinaca ka koreeya waxaa ku qornaa falaar wadno ka dhex taagan,markii Dambana asli ayey ula soo oroday.

Subaxnimadii xaajiyadu waxay u dhaqaaqday howsheedii,iyadoo suxdaasi rabtay Inay aado furdada si ay u ogaato inuu yimid markabkii alaabta u waday.
Nasiib xumase way soo weyday.
Ka soo noqoshadii markii ay mareysay wadada hor marta kaw-anka lagu iibiyo kaluunka ee xamar wayne ayey aragtay cali waraabe oo jidka geeskiisa taagan baabuurkiina u joojisay.

Markii uu soo fuulay ayay ku tiri"-Caliyow aad baan kuugu baahnaa,ee aaway saaxiibkaa Ciise ma qubayste"?

Wuxuu ku tiri,"kharaabasho ayuu ku maqan yahay,"wuxuuna u sii raacshay"xaaji yo safarkaan aaway hadiyaddaydii,kii horeba waad gaqadisaye."

Caliyoow hadiyad wax ka wanaagsan ay aan kuu hayaan,ee saaxiibkaa soo wad,guri-gana iigu imaada casar liiqii".

"Xaajiyo kaalay,masiidanaad iiga tagaysaa? isagoo indho naxariis leh ku sii fiiran aya xaggeeda.

"Maxaa jira?"ayay tiri.

"Qadaa luuq iiga jirtee ee bal ii sax."

Boorsadeedii intay furatay ayay lacag ku filan qado uga soo bixisay.

"Xaajiyo Ilaahay haku sahlo wadaad aad weysada isku dhawrataan."ayuu yiri,intay-qosolhay ayay baabuur keedii dhaqaajisay.

Markii ay guriga timid waxay abaartay qolkii uu taleefoonku ku jiray,waxayna bo orsadeedii kalasoo baxday buugii uu ku qor naa taleefoonka Saadiq.

Kolkii ay dirtay waxaa taleefoonka ka qabtay gabar guriga joogtay.Xaajiyadda oo iska dhigaysa gabadheeda ayaa waxay ku ti ri,"Abaayo Saadiq ma joogaa?"iyadoo codk-eeda u ekeeysiinaysa gabar yar."Maya,"Max aanse u sheegaa hadii uu yimaado."

"Waxaad ku leedahay,xabiibtaa Faadma ayaa taleefoon kuu soo dirtay,waaayna ku



tiri caawa guriga ha iigu yimaado hal saac;arin wayn ayaa u hayaaye.

## QAYBTA LIXAAD

Cali waraabe ma uusan ahayn nin shaq aysta oo xooggiisa maala;wuxuuna ku xeel dheeraa ka qaraabashada xamar weyne iyo shaneemo Banaadir.Da'diisu waxay gaaraysay 40jir.Qofkii aan aqoon u lahayn wuxuu kala kulmaa cabsi iyo naxdin aan laqiyaasi kar in.waligiis ma uusan guursan.kuwa asaagiis ah xataa,wuxuuna gaashaan ka ahaan jiray-hooshaanka.

Habeen kamid ah habeenada ayuu wuxuu arkay gabar aad u qurxoonayd sifiicanna u soo labisatay.Ma uusan fiirin karin gabdh aha noocaas oo kale isagoo waxyeeleeya mo oyee.Waxay garabka ku wadatay boorso mado ow oo damac ku abuurtay,wuxuuna niyadda iska yiri,"Caawa gabadhaan way nooshahay waana inaan kafaa iidaystaa."

Habeenkaas fooska ayaa ka wareersan aa oo ma yusan haysan qarashkii uu ku gad an lahaa biyihii gaduudnaa;maadaama ay is-kasoo dagaaleen saaxiibtiisii.Damiciisu aad ayuu u kordhay aragtidii u danbaysay inuu na is fahamsiiyay inuu habeenkaas raaxays tay haddii uu boorsadaas faraha u dhigo.

Gabadhii oo si xarago leh isaga laaf yoonaysa ayuu dhineceeda u soo dhawaaday, wuuna salaamay.

si wadan ayay uga qaaday iyadoo cabsi ku jirto.Wuxuu waydiiyay gabadh aysan garatin intii ay magacii loo sheegay baadi goobays ay ayuu boorsadii oo isaga soo xigtaysifud ud uga dafay.

Qayladii gabadha waxaa maqlay dhalinya radii hor tubnayd cabitaanka haawaay,intay soo qabteen ayay xaajiyaddii gabadha dhash ay u cid direen markii ay timid ayay waxay tiri,"Aaway ninka lasheegayo ee gabadhayda dafay?"iyadoo faruuryo qaniinsanaysa,kolkii ay u soo dhawaatay oo ay wajigiisa aragtay ayay tiri,"ma Cali waraabuu ahaa?Ma haduu gabadhayda u soo dhigtay,walee inaad doqon tahay ayaad ii sheegtay miyaad ilowday axs aankii aan kuu sameeyay."

Intuu soo orday oo foorarsaday ayuu jil baha kaqabsaday xaajiyadii,isagoo wajigiisa ay murugo ka muuqato ayuu ku yiri,"Xaajiyo iga raali ahow aqoon darro ayaa ii geysay, mana ogeyn iney gabadhaadii ahayd".Mar dan be waa mid aanan u noqon doonin,saaxiibada yna anigaa kala dar daarmayay gabadha wala ashay ah.

Dadkii qaylada isugu soo baxay waxay la wada yaaban yihiin ninka tuuga ahaa siduu u cabaacalayo iyo cabaadka kayeeraaya. Dadkii waxay is waydiinayaan sababta ku ka liftay maadaama uu da'yahay inuu cillaala suuq noqdo,waqtigii uu ilaahay masjidka ku baryilahaa lajoogo.Mida kale aa dadka kafa jicisay waxay ahayd halka ay xaajiyadda is



ku barteen iyo asxaanka ay u samaysay.

Markii ay gurigii timid ayay Caddey oo dariskeeda ahayd weydiisay sababta uu tuugii gabadheeda dafay ee sidii la ogaa u calaacalayay.

"Walaaleey ninka aad arkaysaid aabihii ayaan daris nahayn jiray,Dugsi ayuu dhigan jiray oowaxuu ahaa dhalinta xagga waxbara shada lagu tilmaalo kuwa ugu fiicnaa.Kart idiisii dheerayd ayuu wuxuu ku kasbaday - inuu sanadkaas jamhuuriyadda oo dhan uu noqdo ardaygii ugu sareeyay.Nasiib wanaag waxaa u soo baxay arday cariga Maraykanka loo qaadayo inuu kamid noqdo.Muddo fara badan ayuu dibadda ku maqnaa dadkiisana aanu kawar hayn,markii danbana waxay ka war heleen inuu kamid noqday kuwa suuqa jooga,habeenkiina kuwa baararka hortooda-aan laga wayn.Reerkii sidaas ugama aysan harine intii karaan kooda ahaayay ku dadaa leen,sidii looga soo wadilahaa meeshaas uu ku duloobay,markii lakeenay Xamar waxaa lageeyay shaqo si uu raganimadiisa uu u soo saaro,maadaama ay dadkii ay wax isla soo barteen ay joogaan heer sare,laakiin wuxuu ku soo baxay ma shaqayste,had iyo jeerna wuxuu jeclaa inuu iska hurdo,wuxuu na caado ka dhigtay inuu dhalinta asaagiis ah dawarsado.Dadkiisa marar badan ayay ka gudeen alaabooyin uu soo xaday,kadibna markii uu waayay wax lacag siiya ayuu suu qa iska soo galay,halkaana ay ciddiisii ku caýrisay.Wuxuu ka mid noqday dhalinta suu

qa ku nool.Xabsiga marar badan ayaa loo taxaabay,markii uu galay danbiyo badan oo kala gadisan.Ninkaas aad arkaysid anigoo aqaana ayuu guriga iigu imaan jiray,wixii uu u baahan yahay oo dhana awoodo ayaan siin jiray,anigoo lasocda darxumada uu ku noolyahay.mardhaw ayuu xabsiga kasoo baxay markii ay u dhamaatay mudadii.

Caddeeyy yaaban ayaa waxay tiri,"xaajiyo,muxuu sameeyay"?

"Isaga iyo nin kale ayaa turub ku wada ciyaarayay shineemo Banaadir horteeda, wuxuuna watay lacag fara badan uu soo qaraabtay.wixii laciyaaraba oo ninba markiisa laga helayaa markii danbe Cali waraabe lacagtii uu watay oo dhan lagahelay,waxaana loo sii raacshay,"soo baro turubka hadii ay lacagta kaabadatayna noo keen maalin walba".waana laga tagay.

Sidaa kuma uusan dhaafine intuu ciil kii ka batay ayuu dabgalay tooraydii uu ku qaraaban jiray oo u xirnayd ayuu gasha kala soobaxay,ninkii oo iska sii jeeda ayuu garabka bidix si xun ugaga dhuftay,orod ayuu isku taabtay oo wuxuu niyadda gashtay inuu fakanayo,nasiib xumose waxaa lagu soo qabtay shaneemo ceelgaab isagoo rabay inuu buurka galo.Ciidan waajibkooda qaran guda nayana isla markaana goobjoog ka ahaa ayaa faraha ku soo dhigay oo keenay saldhigga afar irdood,si waajibkiisa loo mariyo.

Walee xaaji Binti,waxaan kagaranayay hadalkeedii macaanaa ee uu kula hadlayay markii aad isla joogteen,hadii uu aqoon u leeyahayna ma uusan sidaas yeeleen."



ayay Caddey hadalkii ku soo gabagabaysay.

"Caddeey caawa sheeko dheer ayaan kuu qabtaye iga raali ahaw."ayadoo fadhigii ka soo kacaysa si ay u sii dhawayso xabiibtee da.

"Cali Waraabe Iyo Saaxiibkiis Waxay yimaadeen Guriga Xaajiyadda, Galabtaas Waxaa Si farxad leh u soo dhaweysay Xaajiyadii Waxayna Wada Fariisteen Barsadda Oo aay Yaaleen Kuraas Loogu Talo Galay. Waxay U soo bandhigtay Arintii ay U wacday, Waxayna Ku tiri, "Caliyoow Waxaa Jira Wiil dhalinyaro ah oo Lacagteydii oo dhan Qaba, Intii aan jidda Ku maqnaa, Gabadheydiina Sababtay ee waxaan rabaa inaan danbi u yeelno."

Intuu qoslay oo kursigii isku Dhacadi idiyay ayuu waxuu yiri "Xaajiya Intaas oo kaliya Miyaa? Weebay Sahlan Tahay. Waxuuna u sii raacshay Shaqadaas Anaa ku xeel dheer ee faraha kala bax Laakiin Joornaatigeena Yuusan Luuq naga galin.

Saadiq Waxuu la yaaban yahay Taleefan ka loo soo diray oo gacalisadiisa ku leedahay ha ii yimaado Caawa arin muhiim ah ayaan u hayaa. "Taloow Maxay Tahay Arintaasu ? ma mid iyada ka weyn baa oo ay xalin kari weyday, Ma duqdii dhashay Ayaa rabsho ku abuurtay, Misa arimo kuwaas ka xoog badan ayaa jira. Wixii jiraba Waa Og. Soow Ayad Midii mar hore i tiri, Ha iigu imaanin Guriga.

Si aan labiskii lagu yaqiinay aheeyn ayuu u soo labistay, Gabadhii Guriga La dageneyd ayaa kaftan ahaan u tiri,"Saadiqoow ma sidanaa Gacalisadaada ugu tageysaa?"

Wax uu ku hadlo ayuu garan waayay, Wuuna iska aamusay

Saacaddu waxay aheyd Todobadii Iyo L abaatan Daqiiqo, Sidii uu u faraxsanaa wa jigiisa ma uusan aheyn, waxuuna si toos ah u yimid Guriga Xaajiyadda, Ugu Horeentii waxuu la kulmay Gabashii adeegtada aheyd oo barsadda Tirtiraysa Waxuuna Ku yiri, "Walaal, Faatma Ma joogtaa?".

"Haa, Qolkaas ayey ku jirtaa Iyadoo u sii tilmaameysa qolkii loo soo tilmaamay ayuu sooa- aaday, Markii uu soo galayna meeshii uu kafilayay Faatma waxuu kala kulmay Laba nin oo Feera Waaweyn kuna Gabbanaa Albaabka Gadaashiisa, Waxayna si Wada jir ah u yiraahdeen "Maxaa ku soo galiyay Guriga Tuug yahoow."?

"Gabadha Faatma la yiraahdo ayaan u imid, Qolkaanaa laygu soo tilmaamay."

Intuu u soo dhawaaday Midkii Cankajeexnaa ayuu dharbaaxo Xabadka uga dhiftay Sanduuq aan ka dheereyn ayuu ku dul dhacay waxuuna u sii raacshay Faatma laguugu soo yeerayaa iska sug, Kii kalana Albaabka ay uu isku gudbay.

Saadiq oo ciil dartiis Indhaha Casaadeen, Waxuuna Niyadda iska yiri"Taloow Nimankan Maxay ahaayeen?" Maxayse u danleeyihiin adigase maxay kaa rabaan? Ma gabadheey kuu diidan yihiin Mise waa tuugo Guriga dhaceysay?



Gabadhii aad soo aadeyna ma sidaneey u galeen mise arimo kale ayeye u danleeyihiin?. "Alla Maxaa iga soo waday Gurigeygi Miyey i qabsan lahayd Xornimo la'aantaan Soow raadintii faatma iima keenin, laakiin waxay ugu danbeysaa Habeenkaan aan joogo. Hadda Maxaan Sameeyaa, Miyaan la Dagalamaa? Soow igama xoog weyna.

Toban Daqiiqo ka dib waxaa qolkii soo galay Saddex Askari oo ay horkaceysay Xaaj iyo Binti. Iyagoon la hadlin ayaa mid ka mid ahaa intuu garabka ka soo qabtay Gacmihiisii Katiinad uga Jabiyay intii ay u sii socdeen Baabuurkii Dibadda u yaalay ayay si kadis ah uga hortimid faatma oo magaalada Alaab ka soo gadaysay. Markii ay Saadiq indhaha ku dhifatay ayay is celin Kari Weyday oo intey soo oroday Askartii Mid ka mid ahaa Gacanta ku dhagtay, Waxayna Ku tiri "Askariyoow, Wiilka Xageed U wadaan"? Iyado la sii socota.

"Tuug waaye Wiilka, Saldhigaana loo wadaa ee Orodoo naga har, Haddii kalana ad igaa lagu raacsiinayaa."

Wiilka tuug ma ahan ee ha u gafin.Kay ey askarigii ku tiri waxayna Aheyd Abaarihii Todobadii Iyo Barkii Habeenimo, Saadiq waxuu ka baqanayey Meesha loo wado, Sababtoo ah Waligiis Gacantiisa Katiinad Laguma xidhin, Waxuuna Niyadda iska lahaa Xagee lagu geeyn doonaa? Ma saldhigā ayaa laguu wadaa mise meel ka sii daran.

Murugo ayuu Mataano la noqday, Waxuuna is fahan siiyay in tuugadii Xamar oo dhan dhexda laga fariisinayo, Aaway Sharafteydi Taloow Faatma Ma ii Imaan doontaa, Miše we ey iga goosan doontaa? Isagoo wajigiisa ho os u foorarinaya.

Askartii Waday Waxay ka sheekeysanayeen, Waxyaabo Koontarabaan ah oo ay soo qabteen, Iyo Ninkii watay, Miyeey Sharaf u ah eyd inuu sidaas Kula Dhaqmo Mujtamaca uu ku dhex nool yahay ayuu yidhi midkii Horaanta Fadhiyay.

Sheekadda aay wateen Dhago uma uusan lahayn Saadiq ee waxaa Hortiisa Yaalay Ninkii Dharbaaxadda ku dhuftay iyo meesha loo wado. Nolosha Qiimaheeda Waxay Ku Wanaagsan tahay Markii dhibaato kuugu Timaado isla markaas inaad Ogaatid Meeshay ka soo bilaabmatay .

Baabuurkii waxaa la soo hordhigay Saldhiga Afar Irddood Waxaana la soo wada galay Qolkii Dacwadda oo uu dhex fadhiyay Askarigii Shaqadda iska lahaa. Dacwaddii Markii la dhagaystay Waxaa la Ogaaday inuu Guri Islaameed Ku Xadgudbay, Waxaana Askartii waday Lagu Yiri Ku qora Oobiga Caawana ha la baaro ".

"Waa yahay Taliye ayey Wada Yiraahdeen.

Naxdintii ayaa ku sii korodhay Laakiin waxuu is tusiyay inuu ilaah Ogyahay Danbiga lagu heysto iyo Ciddii ku lug lahayd.



Waxaa la dhex keenay qol ay ku jiraan Tuugo iyo Aalkuliiste.

Mar kasta waxuu ku dhex mashquulsanaa mashaqadda ku habsatay. Waa habeen aan dha weyn Waagiisuna Dheer yahay, Joog, Jiif, iyo Fadhina uu ka noogay Waxuuna Wehel ka dhigtay Darbiga Agtiisa ah. Xad beel ayey noqdeen Ri'yooyinka Naxdinta lahaa ee isag oo soo jeeda hor imaanayay. Qoraxdii ayaa ku soo baxday isagoo Fadhiya meeshii uu fariistay markii la keenay.

Goor ay Casarkii Tahay Ayaa Qolkii la furay, Waxuuna Maqlay "Saadiq Dibadda u soo Bax." War uma hayo Meesha loo wado Iyo Waxa laga Rabo, Waxaana ku dhalatay Figrad ah malagu deyn doonaa oo danbigii laguu gu heystay ayaa kugu cadaan waayay, Misa qolkan mid ka sii daran ayaa laguu wadaa.

Waxaa la keenay Xafiis, Isagoo uu dhex fadhiyay Askarigii Galabtaas Shaqadda Iska lahaa, Hortiisa Waxaa Yaalay Miiš Aad u qurux badan oo ay dulsaaraayeen Feeylal Badan oo ah kuwa Danbiyadda Lagu Qoro.

Saadiq Waxuu ku fariistay Kursi Horaanta miiska Yaalay, Isagoo Waji iisa ay Cabsi ka Muuqato, Waxuuna Niyadda Iska Leeyahy "Feeylka Ugu Koreeya ma adigaa Iska leh"? Ma danbigii Beenta Ahaa Ayaa kugu Dhex Qoran.

Qolka waxaa kaloo ku dhex jiray Askar tii soo qabatay Mid ka mid ah Aamusnaan yar dabadeed, Waxaa feeylashii kala baxsaday Askarigii Waxuuna ku yiri, "Saadiq soow ad iga Ma ahan? Maxaase Laguugu Daraa.

"Haa waa aniga waxaana la iigu daraa Max'ed."

"Markii aan hadalka kuu fasaxo ayaad hadli kartaa ee la soco .

"Saadiqoow Ma Arday Ayaad Tahay Mise Shaqaale?".

"Shaqaale ayaan ahay, Waxaana Ka Shaq eeyaa Bangiga Ganacsiga Iyo Keydka Soomaal-iyeed, Galabtiina Waxaan Wax ka dhigtaa Du-gsi Beraayfat ah Buuq ayaa ka dhacay Xafii ska Dhinaciisa, Intuu u Adkeysan Waayay Qe-yladii xad dhaafka aheyd ayuu dibadda u so-o baxay si uu u ogaado waxa dhacay.
Waxuu la kulmay Askartii Saldhiga oo ku dh agan Nin Tuug ah, Waxuuna Ku yiri Bal sii daaya aan aragnee waxuu sameeyo." Taliyihi i waxaa loo sheegay Ninkan Tuuga ah inuu soo rartay Guri dhan Alaabtiis, Jidkana lagu soo qabtay . Waxuu amar ku Bixiyay in la xiro ilaa laga helayo Dadkaa alaabta is ka lahaa.

Ka soo-noqoshadii Waxuu Hadalka ka sii watay Su"aalooyinkii q[illegible] u ahaay, Wax uuna Ku yiri" Walaal Maxaa kugu Qasbay A rintan Xatooyadda ah, Madaama aad tahay Nin dhalin yar oo xoogiisa ku shaqeysan kara."



Su'aashaasi waxay uga dareyd waran wa dnaha uga dhacay, Waxuuna Saadiq ku sugtay inuu ilaawo Jawaabtii uu bixin lahaa, Naxd-in awgeed.

Xidiglihii oo ka yaaban Aamusnaantiis a intuu kursigii uu ku fadhiyay ka soo kac ay ayuu si kulul u yiri, "Maxaad la fiigsan tahay maad iiga jawaabtid Su'aashaan ku weeydiiya."

Mar kaliya ayey Maskaxdiisa kuwada ku imaan Xatooyadda Beenta ah ee loo heysto iyo Dhibkii weynaa ee loo geystay ciil dar tiis ayey Ilin uga soo daadatay.

Xidigle Haashim oo dareen xoogle uu ku abuurmay ayuu askartii la joogtay ka codsa day inaey dibadda uga baxaan qadar daqiiqa do ah, Waxuuna Saadiq Ku yiri,"Waan fahmay Ujeedadaada ee hadda Runta ii sheeg."

Saadiq Hadalkii ayaa ka soo bixi Waay ay, Laakiin Markii danbe waxuu go'aansaday inuu u sheego sideey wax u dhaceen, Waxuun a ku yiri Waxaad ii fasaxdaa inaan kuu bil-aabo,."

"Waad Fasaxan tahay, Laakiin Si Tafa tiran iigu sheeg".

Guriga Waan imaan jiray, Laakiin Wax aan u imaan jiray gabadh Xiriir Wanaagsan uu naga dhaxeeyay. Markii Danbe oo aan is fahanayna si hoose-aan isu mehersanay. Waxyabahaas laygu soo eedeyayna waa hadalo la been abuuray mana jiraan wax aan guriga s ka xaday.

Nin Sharafle ayaan ahay oo lawada yaqaano."- Waxuuna u sii raaciyay Taliye haddii xisaab lagu weeydiiyo waligaana aadan maqal, Maxa- ad u maleyneysaa Jawaabta aad bixin doontid? Sababtoo ah Aqoon uma lihid. Haddaba adigoo mar labaad iga raali ah, Waxaan Jeclaan La haa in arintan si fiican loo baaro.

"Saadiq meeqa saac ayaad gurigaaga ka soo baxday?"

"Waxaan ka soo baxay Gurigeyga Hal Sa ac iyo Labaatan."

Qof ku ogaa Ma jirtay, Markii aad soo baxaysay"?

"Haa, Waxaa i ogaa Gabadha Guriga Na la dagan."

"Guriga Xaajiyadda Meeq saac Ayaad t mid, Imisa Qof ayaana Joogtay?"

"Hal saac Iyo Badh ayaan imid waxaana ugu Horeentii Arkay Gabadha Adeegtada ah, Markii aan Faatma Weeydiiyayna, Waxay ii tilmaantay Qol ii dhawaay, Kolkii aan gala yna waxaan kala kulmay Laba Nin Oo Feera waaweeyn iyagoo si xun ii dilay, Sidaasaana Saldhiga laygu Keenay."

"Ninka aqoon ma u lahayd.? Ayuu Xidig lihii yiri.

"Aqoon uma lihi, Habeenkaas ayaana Mu uqaalkooda iigu horeeysay."

"Xidiglihii Jawaabta uu Wiilka Ka Hel ay waxuu ku qortay Feeylkii miiska u dul saarnaa, Waxuuna u yeeray Askartii Dibaada ku sugeysay, Waxuuna ku yiri, "Wiilkan Boo skiisii Hore halooCeliyo, Ka dibna igu soo



noqda. si dhaqso ah ayey ugu soo noqdeen X idigle Haashin, Waxuuna ku yiri Maadayy Na agtii wiilkan Dacwadda u qabtay?" Isagoo sigaarkii u shidnaa sii bakhtiinaya.

Midkii xidiglaha u dhawaa ayaa la soo booday "Taliye Habeenkii Aan Wiilka Gurige eda ka soo wadnay ayaa AragtideedaiNoogu danbeeysay, Waxaana kaloo jirtay ineey hab een taleefan nagu weeydiisay inuu wiilkii xiran yahay."

Labada Nin ee lakala yiraahdo Cali wa raabe Iyo Ciise aqoon ma u leedihiin? Isag oo waraaqooyinkii Aay Markhaatiga ugu Qora ayeen Tusaya.

"Maya, Aqoon uma lihin? Guriga Ayaan habeenkaas ku aragnay."

"Labadaas Nin Saldhiga Oobiga wey ka buuxaan Magacyadooda Markhaatina ma noqon karaan, Sababtoo ah iyagaa tuugo ah.

Taliye, Haddaan Soo Xasuustay oo Wali ba Caliga Cankuu ka jeexan yahay. Isagoo bakoortii Dhulka Uga dhacday soo qaadanaya

"Hadda Waa in dib loogu Noqdaa Guriga aad wiilka ka soo wadeen Islaanta Iyo Gaba dha Adeegtada ah Si Dhaqso ah ha la iigu keeno.

"Waa yahay Taliye, "Ayey Yiraahdeen iyagoo sii baxaya.

## QAYBTII TODOBAAD.

Bashiir waxuu ka war helay Mushkiladda
Baas ee Saaxiibkiis Saadiq ku habsatay.
Waxuu Go'aan ku gaaray intuu xiran yahay
inuusan waxba Banaanka Uga baahan, Had iyo
goorna wuu la socdaa Xaalada uu ku sugan
yahay Iyo Kawar hoeynta Xaaskiisa Qaaliga
aheyd.

Maalin aay Arbaco Aheyd ayuu Bashiir
Baabuurkiisii Soo qaatay, Isagoo Rabay inu
xabiibkiis Alaab u keeno Markii u marayay
shaleemo shantaraale Hortooda ayuu Baabuur
ka Haadkiisa ka arakay Faatma oo gacanta
kuwadata Bac buux dhaaftay. si dhaqso ah
ayuu Baabuurkii u joojiyay. Salaan Dabadeed
Waxuu ka furay Albaabkii waxuuna ku yiri,
"Dumaashi Maxaa kugu Dhacay Beryahan Waaba
lagu waayee?".

Aniga la ima weeynin oo marar badan a
yaan guriga imid Nasiib xumase waan is hal
eeli kari weeynay oo xaaskaaga ayaa ii she
egay in beryahaas aad ku mashquulsaneyd al
aab furdada kaaga jirtay.

Waa runtaa, Xagii Saadiq ayaan u socd
ay si aan ugu geeyo sigaar uu ii soo dirsa
day ee walaal Xageed Waqtigan u wirwireysaa?
Isagoo dhoola Cadeynaya.

Bashiiroow Waxaan U maleeynayaa Inaan
isku meel u socono ee ina mari, Nasiibkeyga
ayaa aad u fiican Haddii uu ilaahay Ila ka
a kulmiyay.



Nasiib wanaag markii ay tageen saldhigii
waxay fursada u helaen in Saadiq is arkaan
si ay uga wada sheekaystaan arimihiisa ha
lka ay marayaan.ugu danbayntiina waxay sii
yeen alaabooyinkii ay u wadeen.

Askartii markii ay tageen guriga xaa
jiyadda,nasiib ximo way ka waayeen oo wax
ay ku maqnayd magaaladda,lakiin gabadhii
adeegtada ahayd ayaa lasocodsiisay iney
soo dhawdahay,lana joogo waqtigii ay imaan
jirtay.

Xaajiyadii oo ay ka qasnayn ayaa gur
igii timid,waxay na askartii lasocodsiiye
en in ayada iyo adeegtadaba laga raho sal
dhigga,waxayna soo wada raaceen gaarigii
ay wadataya.

Imaan shihii saldhigga waxay si toos
ah ugu geeyeen xidigle haashim oo xafiis-
kiisa fadhiyay,isla markaana kafaraxashay
dadwad uu qaadayay.waxuu amar ku bixiyay
in gabadha dibadda loo saaro xaajiyadana
ay isku soo haraan.

Haashim sidii caadada u ahaan
jirtay wuxuu lasoo baxay waraaqo dhawr ah
oo ugu jiray khaanadda kore ee miiska,wux
uuna waydiiyay su'aalo badan oo jawaabtoo
da dareen ku abuurtay ,markii danbe waxuu
u yeeray askartii dibadda joogtay si ay
u soo galiyaan,xaajiyadana banaan
gabadha u soo galiyaan,xaajiyadana banaan
ka looga saaro;waxuuna si hoodaad ah aska
rtii ugu yiri,"Saadiq halasoo saaro,hana-
lageeyo guriga uu sheegayo gabadha uu idin
tusana soo wada."

Isagoo aad ugu soo takhasusay sida dad ka hadalka looga baaro ayuu wuxuu ku yiri, "waxaan u malaynayaa inaad tahay gabar dhalin yaro ah oo u baahan inaad mustaqbal dhisatid,mana fiicna inaad wixii aad ogeyd qarisid isagoo ilaahay ku ogtahay.Hadda waxaan rabaa inaad ii sheegtid aqoonta aad u leedahay wiilka Saadiq layiraahdo iyo habeenkii lasoo qabanayay siday wax u dhaceen.

Intey jimicsatay oo gacmaha dhabarka ku qabsatay ayay waxay tiri,"Ilaahay beenta waa diiday,wuxuuna jeecl yahay inrunta las heego,xaajiyaddu god ilama galayso,abootka na igama jafayso,hadii ay rabto gurigeeda ha iga cayriso,ileeyn qof wayn ayaan ahay oo xamar kashaqaysan kara",wiilka Saadiq layiraahdo danbiga lagu haysto oo ah xatooyo waa mid aysan waxba kajirin,sababtoo ah waa hadalo ay is la soo dhisteen xaajiyadda iyo laba nin oo galabtaas guriga yimid,

Waxaa qolka lasoo galiyay gabadhii Saadiq ay isku guriga ahaayeen,waxayna sheegtay inuu Saadiq guriga kasoo baxay hal saac iyo labaatan,waliba markii uu soo baxayay ay ku tuurtay erayo kaftan ahaa.

"Maxay ahaayeen erayadaas"?

"Saadiqow,ma daanaa gacalisadaada ugu sootaa."Jaaw isagoo ii celin ayuu dibadda u soo baxay.

Haashim markii uu iski fiiriyay wax bixintii uu kakala qotay dadkii loo yeeray waxay noqdeen kuwo farqi wayn u dhexeeyo, waliw ay isku dhawaayeen hadaladii Saadiq



iyo waxbixintii labada gabdhood ee kala ga disnaa.isagoo si daggan u kaashanaya waayo aragnimadiisa ayuu askartii kiiska ku qorn ayd faray inlakeeno labada nin eelakala yi raahdo Cali waraabe iyo ciise maqubatte.

Askartii oo guda gashay hawshii loo diray ayay waxay kasoo qabteen(Abaxuseenka) iyagoo tereb ku ciyaaraya,kuwa kalana aal kolo ku cabayaan markii ay faraha ku dhigeen labadoodii waxay keeneen saldhigii. nasiib wanaag waxay lakulmeen xidigle haashim oo shaqada kabixi lahaa,wuxuuna ku yiri "makeenteen nimankii odayaasha ahaa".

"Haa." ayey wada yiraahdeen."

Waxuu lagalay qolkii u gaarka ahaa, Waxuuna hadalkii uga bilaabay," Aqoon fiican ayaan idiin leeyahay, Haddaba Arinta aad markhaatiga ka tihiin su'aalaha aan idinka weeydiinayo si fiican iiga jawaaba."

Fiiris ayey isula dhaqaaqeen intii aan wax su'aal ah la weeydiinin, Waliba uu Cali waraabe ugu darnaa isagoo ka baqayay inuu Saxiibkiis Runta sheego.

Haashim waxuu Askartii Faray ineey Cali Waraabe Qolka Kale Geeyaan, Waxuuna Ciise Ma qubeeyste ku yiri"Aqoon ma u leedahay Wiilka Xiran?".

Isagoo Baqanaya ayuu yiri, "Aqoon uma lihi".

Xidiglihii ayaa yiri,"Guriga Xaajiyada Maxaa ku keenay?".

Saaxiibkeey ayaan isa soo raacnay, Waxuuna igu yiri"Xaajiyadaa Shaqo noo Haysa."

"Wiilka Saadiq la yiraahdo Lacag uu qaadanayo ma aragtay?".

"Wax aan arkay ma jiraan."

"Xaajiyadda maxaa kuwada heshiiseen?"

"Aniga ilama aysan hadhin oo aqoon Fiican isuma lahayn laakiin Cali Waraabe ayeey aad isugu dheeraayeen, Qol ayey isla galeen oo aay ku soo sheeko bogteen."

"Aad iyo aad ayaad u fiican tahay ee Banaanka isaga bax."

"Waxaa loo yeeray Cali Waraabe Waxaana lagu yiri, "Caliyoow Baryahaan Waad fiicnaatay oo Saldhiga waan kugu arki waayay ee Maxay aheyd Arintan aad Markhaatiga ka aheydeen, Waloow uu Saaxiibkaa ii Taabtah-tay,"

Talo farihiisa ayey ka baxday Madaama Saaxiibkiis runta ku taagsaday, Cabsina uu ka qabay markii hore ee saldhiga la keenay dantu waxay ku qasabtay inuu isagana runta sheego, Waxuuna ku yiri "Aniga iyo Saaxii bkeey oo isla socono ayaan ku soo leexanay Guriga Xaajiyadda, Anagoo Socdaalkeenu ahaa inaan Xaajiyadda Shaxaad ka qaadano, Maadaama uu suuqa nagu xumaa; Markii aan guriga foodа soo galinay ayaa waxaa naloo soo dhaweeyay sidii dad marti ah waloow aan shaki ka qaaday, Waxayna Xaajiyadu nagu tiri, "Caawo Cashadiinu Waa halkan;" Ujeedada ka danbeeysana aanan wali garan anig oo aay ila ahaatay ineey guriga ka jirto Amuur.



Markii aan cabitaankii dhamaysanay ay ey xaajiyaddu i wacday, waxayna ila gashay qol aan meesha ka dheerayn, waxayna ii she egtay u jeedadeeda oo dhan, waxayna ila no qotay wax saklan.

aad ayaad u mahad sanatahay sida bini aadamnimadа ku dhisan ee aad runta iigu e sheegtay, Haashimna wuxuu halkaas ku ogaad ay inuu wiilku ku xiran yahay danbi la'aan. iyadoo ay soo nabsatay islaanta xaajiyadda lagu sheegayo.

Haashim waxuu isku soo aruuriyay war aaqooyinkii uu kakala qotay dadkii kala e gadisnaa, ee uu wareysiga layeeshay, wuxuu u geeyay faylkii ay ku jireen taliyihii-saldhigga, isagoo is fiican ugu kala shee gaysiday wax u dheceen. Taliyihii markuu isku fiiriyay waraaqooyinkii waxaa halkaas ku cadaatay inuusan wax danbi lahayn wiil ka xiran, wuxuuna amar ku bixiyay in si dh aqso ah loo sii daayo.

Haashim wuxuu amar ku bixiyay in si d dhaqso ah loogu keeno Saadiq. Markii laga soo bixiyay qolkii uu ku xirnaa; waxuu dar eenaynafis weyn, waxaana lakeenay qolkii l looga wacan. waxay u ahayd markii ugu hora yasay ee uu helo aaryo macaan intii uu xi maa oo dhan. Waxaa soo dhacay taleefan, mar kii uu kor u qaaday xiddiglihii ayuu maql ay cod dumareed oo dhahaya saw ma ahan sa ldhigga?.

"Haa, waa isagii ee maxaa darnaa"? isagoo kursigiisii soo jiidanaya.

"Dagaal ayaa kadhacay xaafadda ee ha

nalasoo gaaro".

"Waa xaggee",ayuu ki yiri,

"Boostadii hore gadaasheeda."

"Waa yahay."

intuu si deg deg ah uga soo baxay qolkii ayuu u yeeray askarigii shaqada iska lahaa,Wuxuuna ku yiri,"si dhaqso ah halagu tago meesha rabshadu kadhacday,isagoo ku sii tilmaamaya.

Kasoo noqoshadii ayuu Saadiq kuyiri, "waxaan kuugu bishaaraynayaa inuu danbigi i lagugu haystay kugu caddaan waayay,lana helay cidii soo abaabushay.Waxaadna ogaat aa wax kasta oo adduunka guudkiisa ka dhaca ay yihiin wax eebe xaggiisa ka qoran. Hadda wixii ka bilowda waad bixi kartaa a adigoo naga raali ah.

Saadiq aad ayuu ugu farxay,maadaama ay u ahayd waayo aragnimo ku filan,laakiin wuxuu aad uga xumaa helitaanka lahelay qofkii soo abaabulay xiriddiisa? Markii uu saldhiggii kasoo baxay wuxuu yimid gurigii uu daganaa,waxaa u soo gurmaday oo kawar helay soo dayntiisa dadkii ay dariska aha ayeen oo aad u jeclaa asluub wanaagiisa? Middaas Saadiq waxaa uga sii darnaa kawar hayn la'aanta xabiibtiisa qaaliga ahayd, wuxuuna niyadda gashtay iney lama huraan tahay inuu si dhaqso ah taleefan ugu diro Cabaar markii ay dadkii kala yaraadeeh ay uu u diray uguna bishaareeyay inuu xabsigii kasoo baxay,waxayna u sheegtay inay u imaandoonto.



Imaansho kadib waxay Faatma Saadiq u keentay hadiyad aad u qurux badan oo ay ugu tacsiyeynaysay,intii uu kaxirnaa oo ay arag tidooda yarayd.Muddo markii uu Saadiq uga e sheekeeyay waxyaabihii uu xabsiga kala soo kulmay ayuu hadal lasoo booday,kadibna uu lahakaday.

Faatma oo kayaabtay is badalka cusub ee ku soo kordhay ayaa waxay ku tiri,"Aboowe m macaan,maxaa kugu dhacay?ood hadalka ula no qotay,ma anigaad wax iga qarinaysaa."

"Waxba kaama qarinayo,laakiin inaan kuu sheego ma aannan jeclaysan,sababtoo ah waa mid aad kuu dhibaya."

"Maxaa i dhibaya?"ayay si fudud ulasoo booday.

"Waxaa jirta in hooyadaa...;Ayuu aamusay.

"Gacaliye,maad ii dhamays tirtid warka."

"iyadoo gacanteeda midig garabkiisa sii saar aysa.Intuu hoos u sii jeestay ayuu wuxuu ku yiri,"Hooyadaa waa la xiray."isagoo codkiiss sii gaabinaya.

Qadar yar ayay aamustay oo madaxa lux l luxday,waxayna ku tiri,"Mashaakil malahan waa layska soo daynayaa haddii uu ilaahay idmo."

"Saadiq isagoo muujinaya inuu aad uga x xunyahay ayuu Faatma madaxeeda intuu soo qabtay xabadkiisa saaray,wuxuuna ku yiri," Gacalkiso iska samir,waxaan la arkayn majirto "Habeenkii waxay wada aadeen Magaalada meel ihii taariikhiga ahaa oo ay jacaylkooda ku soo bilaabeen.

Muxibaddii iyo kal gacalkii aad ayuu u sii kordhay, iyadoo ay ugu wacnayd jacaylkka ay isu qabaan.

Habeenkii markii uu guriga tagay hurdo way kasoo dhici wayday fakar awgiis. isagoo goor walba soo xasuusanayay erayadii ay xa biibtiisa kula hadlaysay. subaxnimadii waxuu u jarmaaday shaqadii uu dhawr maalimood ka maqnaa, isagoo horay u sii maray saaxiibkiis Bashiir, waxuuna lasocodsiiyay iney xaajiya dii xiran tahay, falkii ay geysatay awgiis?

Saadiq markii uu shaqadii yimid waxaa loo soo dhaweeyay si heer sare ah, waxaana u yeeray agaasimaha qaybtiisa isla maalint aas waxaa hadax looga dhigay wafti kormeer shaqo ugu kicitimayay gobolka W/Galbeed.

Bashiir wuxuu soo aaday saldhigii si uu u xaliyo arinta xaajiyadda. wuxuu u tagay askarigii kiiska ku qornaa oo magaciisa la soo siiyay, wuxuuna farta kasaaray waraaq u uu soo qoray Saadiq, uuna leeyahay ninka waraaqda kuu keenaya ayaa iga wakiil ah sababtoo ah shaqo qaran ayaa la iidiray iyo markii uu waraaqdii askarigii akhri yaywixii dhexda uga qoraana fahmay iyo Tee-sarahii Saadiq. Waxuu u geeyay Taliyihii S Saldhiga Si arimaheeda Loogu Fududeeyo, Ma-adaama Danbigii uu ku cad yahay.

Xaajiya, Binti Deeymadaas Waxaa uga s sii daraa Alaabtii ay markabka soo saartay oo intey Xirneyd ka cabsaneysay inuu soo x xirtay. Subaxnimadii ayey Tagtay Dekadii s si ay u soo hubiso Markabkii, Nasiib Xumase inuu Markabkii alaabta u waday oo magaciisa



Linea-Bus, Uu badda Dhexdeeda ku Halaabay - haddana laysku khilaafsan yahay in wadankii lagu sameeyn lahaa loo jiido ama meeshiisa lagu sameeyo.

Markii hadaladaas ay dhagaheeda soo Ga areen talo aya ku dhalatay oo waxay garan w weeysay meeshay wax ka qaban lahayd iyo cid ay kala khaashan lahayd. Midda kale ee sii haysatay waxay aheyd iyadoo gabadhii Aduuny ada oo dhan ka fiirsaneysay Wareeg Maaro uga la'dahay.

## QAYBTA SIDEEDAAD (8).

Habeenku Waa jimco, Xaajiya Binti Waxaa Maskaxdeeda kuwada Kulmay Arrimo dhoowr ah oo maskaxdeedii ka xoog badiyay Haddii ay s ii raacdana waxay ka cabsaneysay ineey mask axdu wax ka gaarto, Markii danbe waxay Go'a ansatay ineysan Guriga Meel uga Bixin Habee nkaas, Sababtoo ah Waxay Ka ganbaneysay Mas-haakilka Faraha adnaa. Sariirteedii ayey i isku dul duurtay, Waxayna Jecleyd Iney is H Hilmaansiiso Waxyaabihii ay Soo Martay Siti-maankii Hore, Shan daqiiqo ka dib, Waxay Ma-qashay Dhawaaqa Taleefoonka Waxayna si Raaxo leh u soo qabsatay Taleefankii oo aan ka dh eereyn, oo ay ku tiri"Hallow"

"Waa Anigee Soow ma ahan Guriga Xaajiya Binti."

"Haah Waa anigiiyee yaad Rabtay?"

"

"Waxaan u baahnaa Xaajiyadda ee si Dhaqso leh halaygu Waco."

"Maxaad ka rabtaa?"Ayey Tiri Iyadoo Y Yaaban.

"Guriga soow ma joogto"?

"Wey Joogtaa Qofka kula hadlaayaana W Waa Iyadii, ee Adigu yaad tahay?"

"Haye Walaal Maxaad Mar Hore iigu Sheegi weyday inaad adi ii tahay waaba ku daaliyee."

"Macno malahan ee Caafimaadkaada Iyo Caruurtii iiga waran" Ayey Tiri iyadoo sii qosleysa.

"Aad Iyo Aad ayey u fiican yihiin ee Adigana sidcey kuu tahay Gabadhaadii."

"Ilaahay mahaddii weyna iska Fiican t tahay."

"Walaal, Waxaan Jeclaan Lahaa inaad s Si dhaqso ah Jiddo ku timaadid Sababtoo ah waxaan Guda Galay Arintii aan isku Ogeeyn, Imaanshahaaga Ayeyna ku xiran tahay Oo Gab agaba ayay ku dhawdahay.

"Walaal Ma xuma oo aad ayaan ugu Fara xsanahay Hadaladii Macaanaa ee aad ii soo tabisay, Laakiin Arin Xun ayaa iga hortaag an oo gurigiina Qof aan Uga soo tago Mahay sto.

"Aaway Gabadhii aad Dhashay Iyo Midii adeegtada Aheyd.

"Kuwaas Guri Kuuma Xafidayaan, Safarkii Hore Ayey Taariikh Lama Ilaawaan ah igu Rideen, Ka soo Tagidooda u baahan in loo fii rsado si xaaladooda loo ilaaliyo.



Waxaad Yeeshaa Gabadha aad dhashay si fiican ula hadal, Uguna Bishaarcey soo Noqos hadaada in loo sameeyn doono wax walba oo aay dunidda uga baahan tahay.

"Cabsi Weyn ayaan ka qabaa, Waxaana qalbigeyga Wali aan ka go'in Safarkii Hore waxay igu Sameeysay, Laakiin Walaal Hadal adda aad igu Tiri Ayaan Yeelayaa.

"Xaajiya Binti Markii ay ka tagtay G Garoonka Diyaaradaha Ee Jidda Waxaa Garoonka Joogay Walaalkeed, Waxayna Guriga k kuwada Tageen Gaari uu isaga Lahaa. Markii ay Guriga Tageen Waxaa si Xiiso Leh u soo dhaweeyay Madiina oo Xaaska Yuusuf Aheyd oo in muddo ah Aysan is Arkin.
Habeenimadii Waxaa loo sameeyay Casho Heer sare ah loo agaasimay, Halkaas oo ay kuwada fiirsadeen Filim aay aad u jecleesteen

Subaxnimadii Yuusuf Waxuu Tagay Guriga Saaxiibkiis Cali isagoo Ujeedadiisa Aheyd inuu la socodsiiyo inay Xaajiyadii Timid, Markii uu tagayna Waxaa loo sheegay inuu shaqo ku maqan yahay, Yuusuf oo jecl aa inuu arko si aysan Arinta Dib uga dhiic in Ayuu waxuu Xaaskiisa ku yiri,"Markii u u yimaado Waxaad u sheegtaa inuu Yuusuf U yimid."

Ka soo tagidii Guriga Waxay [illegible] kuwada kulmeen Guriga hoostiisa intey isku soo boodeene oo Xabadka Xabadka isku saar een labadana Daan iska dhunkadeen ayuu Cali yiri "Saaxiib Ilaahay ma soo Ururiyay iyadoo Caafimaad qabta.

isagoo wali ku dhagan.

Ilaah mahaddii Weeye , Weeyna Caafima ad qabtaa, Habeen Danbe Guriga Ayaan Kugu sugeynaa Adiga Iyo Xaajiyo Binti si aan u wada yeelano Fadhigii Ugu Danbeeyay.

Cali isagoo Dherarsanaa inta laga Gaarayo Habeenkaas Ayuu Waxuu Yimid Guriga Saaxiibkiis, Isagoo ay Wajigiisa Ka Muuqato Farxad aan la qiyaasi Karin. Waxaa si kalgacal Iyo Saaxiibtinimo Ku dhisan u soo Dhaweeya Yuusuf, Waxayna Wada Fariisteen Qolka fadhiga oo habeenkaas aad looga shaqeeyay . Miiska Hortooda Yaalay Waxaa Ku kortubnaa Cabitaano kala Nooc ah iyo Cunto Wada Qasa cadeysan.

Waxuu aadgy Qolkii Xaajiyadda uu ku w Ogaa Iyadoo Tukashadii Dhameeysatay Arkay Waxuuna ku yiri"Cali Wuu yimid" Waxay u si i raacisay Waan Duceeysanayaa ee isii suga

Waxay soo gashay Qolkii ay ku jiraan cali iyo Yuusuf, Dabadeed Isbarasho Heer S sare ah ayaa Qolkii Gudihiisa Ka Dhacday W Waxaana Hadalkii Qaaday Cali Oo Yiri"Hooyo aad ayaad u mahadsan tahay Madaama aad Cod sigeygii ii tixgalisay Wadan Fogna aad iiga timid Saaxiibkeey Ayaa Arintan aan caawo u wada fadhino mar hore ila Socodsiiyay, Anigana ma aanan Jecleysan inaan ku diido sid aasaana laguugu yeeray Iyo Aaraadii aad ka dhiiban lahayd ."



"Walaal Markii aan Dhageystay Hadaka daada iyo Warbixintii uu walaalkeey iiga soo sheegay waa mid aad u wanaagsan, Sababta aan gabadha kuu siiyayna waxay tahay waalkey iga weeyn oo iga fuqi waayay Xama rna ugama aan waayin wiil dhalinyaro ah aan ku daro Duco Fiicana aan ka qaato.

"Intuu qoslay ayuu Xaajiyadii ku yiri "Waxyaabahaas agteyda waxba kama ahan, Ilaahayna Waxbuu i siiyay waxaadna arki doo ntaa markii aan si fiican isu barano.

"Calkiyoow, Dhawaan waxaan jeclaan la haa inaan baxo."

"Xageed u ordeydaa?, Soow mardhow ma aadan imaanin ."

"Gurigii ayaa iga cidlo ah Gabdhihii waxay u baahan yihiin Wehel madaama ay Ca bsanayaan Haddii uu gabalku dhaco."

"Waa Runtaa, In la fikirana waa wana agsan tahay, Gurigaana Kuugu imanayaa ee nabad galyo,."

Yuusuf oo Saaxiibkiis sii sagootinaya ayaa waxuu yiri"Saaxiiboow Xaajiyadda Ha nagu ceebeeyn."

Intuu Saaxiibkiis Garabka Dharbaaxo ku dhuftay, "Ayuu ku yiri,"Ha Walwalin Mi daas ee aniga igu haleey, Waxaanse ka cab sanayaa inay xaajiyadu Tiraahdo Waan iska joogayaa.

"Halagaa arko Saaxiiboow".

Cali isague Waxuu soo abaaray Gurigi iisa, Intii uu jidka Ku soosocday Waxaa u bilaabmatay inuu Maskaxdiisa ka shaqeeysi iyo.

Waxuuna is yiraahdaa Taloow Xaajiyadda sid ean wax u siiyaa ama aan uga farxiyaa, Ma jeed ayaan u qoraa mise lacag cadaan ah oo aay alaab ku gadato ayaan siiyaa? Maskaxdi isa crayadaas iyo kuwo ka daran ayaa ku mo eyreeysanayay; Markii Danbe waxuu Go'aan ku gaaray inuu lacag cadaan siiyo. Waxuuna ku dhaqaaqay Meelihii ay wax ugu keeydsana yeen.

Subaxnimadii ayuu Xaajiyadda Lacagti u keenay iyadoo Markii ay aragtay tiradeeda aad ugu faraxday, Waxayna u sheegtay iney gabadha isaga u joogto Wixii Waqtigan Ka bilowda Markii u fasax helana uu Xamar yi maado si uu gabadha u arko, Nikaaxana loo sameeyo.

Niyadiisa Waxuu ugu bishaareeyay Inuu Gabadh Islaatay Ay Gacantiisa Soo Gashay Muddo Badana uu Raadi Goobayay, Waxuuna Il aahay Ka baryay iney Nogoto Mid aay isku raagaan. Waxuu uga balan qaaday Dadka Aroo skiisa ka soo qeybgalaya iney la kulmi do onaan Waxyaabo aan maskaxdooda ka gu'in. Maskaxdiisu Waxay isku Khilaafsaneyd Halka lagu Dhigayo Arooska Iyo Halka ay ku aqal gali doonaan. Durbadiiba Waxuu Fasax ka Soo Qaatay Shirkadii uu ka shaqeeynayay isagoo arinta soo food saartay La socodsiiay Madaxdiisa, Waxaana La siiyay Hal Bil Oo Fasax ah Iyo Xoogaa- Lacag ah . Hadiyayooy-in ayuu Horey u soo gaday oo ugu soo talo galay Gabadha la siiyay Iyo Hooyadeed.



Subaxnimadii Khamiistii ayuu ka soo Sh-iraacday Magaaladda Jidda, Isagoo Mar Hore Taleefon Xaajiyadda u soo Diray. Diyaaraddi uu la Socday Ayaa Soo Caga dhigatay Garoonka Caalamiga ah ee Muqdisho. Jawigu Garoonka Waxuu ahaa Mid aad u Camirnaa Dad Badan Isu gu Yimaadeen, Isagoo isugu Jiray Dhoofayaal iyo Sagootiyayaal. Xaajiya Binti Waxay Ka m mid aheyd Dadkii Dherereyay intey Diyaaradda ka imaaneeyso, Waxayna Taagneyd Meel Koone si ay u aragto Cali.

Ka soo Qulqulidii Diyaaradda Ayaa Bila abmatay, Qadar Laba Daqiiqo ah Markiiay Dad kii soo dageen Waxaa Jaran Jaradii Ku soo s ocday Nin Dheer Oo Caddaa Haddana Ku Darsad ay Lafweeynaan Waxuuna Gashanaa Khamiis Cad Iyo Koofi Madoow, Gacantana Waxuu Ku watay boorso Madoow.

Xaajiya Binti Shaki Ayaa ku abuurmay oo Waxay Kala Garan Weysay Inuu Cali Yahay iyo In kale Qeeybaha Maskaxdiisa Waxay Ku dagaalamayeen Waa Isagii Iyo Waa Nin Kale eto eeka joog. Markii Uu Dibadda u soo Baxay, Isagoo Cabsi Ku Jirto ayey Gadaashiisa ka tiri "Caliyoow, Markii uu gadaal soo Fiiriy-ay Waxuu Indhaha ku dhuftay Xaajiyadda, Int uu is heeyn kari waayay ayuu Salaan Kula so o Booday, Iyadana si Kalgacal ku dhisan ayey uga qaaday. Waxay U soo Wada Dhaqaaaeen Xagg ii Baabuurka Xaajiyadda oo Banaanka Yaalay

Cali Markii Guriga la keenay Waxuu Joo leeystay Ineey Xaajiyadu Wax uga sheegtay Xaaladda ay Gabadhu Ku sugan tahay,

Maadaama ay Bilooyin ku dhawdahay intii uu ka maqnaaK

Gabadhii Weey Saafimaad Qabtaa, Wax Mashaakil ahna nalama soo darsin ee Walaal oow Waxaan kula jecleeystay inaad Maalmo iska nasatid Ka dibna aan Nikaaxii u tabaa busheeysano.

Cali Isaga Mid Hadalkaas u Cuntamaya uma uusan aheyn ee waxuu Xaajiyadii Ku yiri Aligu Waxaan ka imid dhul fog Waxaanan Joogayaa waqti tirsan ee waxaan jecleystay in gabadhii la igu Nikaaxo Aqalkiina aan ka d dhigano Jidda.

Fadhi uma yaalin Xaajiyo Binti, Illeen Gabadheedii ayaa la nikaaxayaa Habeenka Jimcaha ay soo galeyso. Waxay Gashay Hoowl A dag oo in Muuddo ah Sugeysay, Waraaqooyinkii Wixitaanka ayay u qeeybisay Asxaabteeda iyo Intii Xaafadda la daganeyd oo ay isku dheeraayeen. Waliba ha u sii Badnaadeen Ganacsataayaasha Caanka ah. Waxay Niyadda iska tiri"Ilaahayoow Nikaax Kheeyrqaba In ooga wada dhig. Goobtii Nikaaxa Lagu Qaban lahaa ayaa la sharxay, Gurigana Waxaa lagu dhajiyay Nalal Kala Nooc ah.

Cali oo habeenkaas Niyadiisu Aad u Ka cseneyd, Ugana Wanaagsaneyd Habeenkii uu d dhashay.-Si Heer Sare ayuu isku soo diyaar iyay isagoo soo Gashaday dhar aad u fiicna isagoo Hareera Socdeen Saaxiibadiis.





Saadiq waxaa u soo dhamaatay safarkii yaraa ee gobolada loo diray,wuxuu kawal wal sahaa xaaladda ay ku sugan tahay xabiibtiis ii Faatma.Imaatinkiisii wuxuu soo abaaray gurigoodii;markii uu usoo dhawaaday wuxuu arkay gurigii oo is badal wayn ka muuqdo. Dhalinyaro kubadda ku ciyaaraysay guriga dh iniciisa ayuu soo ag istaagay wuxuuna gavan ta qabtay mid agtiisa marayay,wuxuuna ku yi ri,"Aboowe waxaan kuugu hanbal yaynayaa sid ii wacanayd oo aad ku badda u ciyaaraysay."

"Waad mahadsan atoagy,"ma ahi dhalinyar ada iyagoo waawayn kubada bartay,yaraantii ayaan ku soo bar baaray,"

"Walaal gurigan maxaa kajira,"

"Ma ogid miyaa?,xaafadda oo dhan way la wada soxotaa,waxaa lanikaaxayaa xaajiya Bin yi gabadheedii."

"Magaceed gabadhaas",isagoo aad u naxsan.

"Waxa layiraa Faatma,"[illegible] uuii ra ci [illegible]edii.

"Faatma,aa!hadalkii wuuukasoo bixi waay ay,waran ayaa feeraha bidix uga taagmay, socodkiina wuu kari waayay,xubnihii jirka e oo dhan ayaa tamartii socodka kawada gaabiy ay,wuxuuna layaaban yahay siduu yecli doono mashaakilka kadiska ah ee soo foodsaaray,

Sidee bay ku dhici kartaa gabar aan mar hore soo nikaaxsaday in nin kale lagu soo - nikaaxo,saw diinteena ma aysan diidin in ni kaax lakor saaro nikaax kale.

Qofkii ku kacana sow ciqaab xun lama kulma yo,nayaa khasab layga firi karaa anigoo go oh joog ah,iyaduna ay jacay ii qabto.

Intuu is hayn kari waayay ayuu gurigii u soo dararay,wuxuuna durbadiiba qorshayst ay hadaladii uu habeenkaas lashir tagi lah aa wuxuu soo baxsaday waraaqihii nikaaxa oo meel asturan ugu jiray,isagoo aamihsanaa inla'aantood aysan waxba u suuroobayn.Habeenkaas wuxuu soo gashtay dhar heer sare ah oo ay Faatma gacantaada ugu soo gaday,saba bta uu uxoo qaatayna waxay ahayd incy soo xasuusato habeynkii taariikhda lahaa.

Guriga markii uu usoo dhawaaday wuxuu arkay dad badan oo horaantiisa buuxay,albabkana waxaa taagnaa wiil dhalinyaro ah oo waraaqooyinka wicitaanka aruurinayay,dad badana soo celiyay iyagoon waraaqihii wadanin,awgeed?Saadiq mushkilada wayn ee haysatay waxay ahayd isagoo faro marnaa,siduu kugali lahaa ayuu ku fakaray,maadaama arintaa haysata aysan fududayn.Intuu isgeesini mo galiyay ayuu soo abaaray albaabkii,wuxuna wiilkii ku yiri,"walaal meeday waraaqdii wicitaanku,"

Gacantuu lagalay jaakaddii uu watay,isagoo iska dhigaya nin lasoo baxaya waraaqdii,wuxuuna ku yiri,"walaal aad ayaan uga xumahay waraaqdii waan kasoo tagay."

Willkii wuxuu ku qancay sida wanaagsan ee loola hadlay,maddaama uu Saadiq u ekaanin xafladda ku soo talo galay.

Wuxuu soo abaaray banaankii waynaa oo ay yaaleen darmooyin,joodariyaal iyo barki



mooyin oo martida ay kuwada fadhiyaan,waxu una fadhiistay meeshii ugu dhawayd,martidii ayaa si xad dhaaf ah u soo qul qushay waxau soo xasuustay oraah macaanayd oo ay ku tiri Faatma habeen ka mid ah habeenada iyagoo d dhex fadhiyay heer aad u qurxoonayd.

Agtiisa waxaa fadhiyay nin waayeel ahaa oo dareemay in wiilka meel laga haysto,wuxuuna ku yiri";Iga rkey giiyow,ma xanuunaa ku haaya mise meel kale ayaa lagaa haystaa isagoo u soo dhawaanaya.

"Adeer ma jirani oo waan caafimaad qab aa,laakiin waxaa ca wai...."ayuu aamusay.

Ninkii intuu u adkeeysan waayay ayuu cimaamadiisa ilinta uga tirtiray, Isagoo k ku yiri "Ilaahay ha kuu fududeeyo Arintan kaa ilmeeysiisay."

Cajaladdii Quraanka aheyd ee uu Akhri yayay Sh.Cabdi Baasid Ayaa si Raaxo leh la gu dhagaysanayay ayaa waxa soo galay Wada dkii isagoo fariistay Meel gooni ah oo aad sharaxneyd. Qadar daqiiqado ka dib Wadaad kii Hortiisa Soo Fariistay Nin Dheer Oo xo og lahaa waxuuna gashanaa Jaako Cad Iyo Su rwaal Madoow, Talo Ayaa ku dhalatay Saadiq Muuqaalka Ninkaa Markuu arkay Waxuu agaaday Ninkaa xoogi raba Inuu isaga Yahay, Waxuuna N Niyadda Iska Yiri "Wallee Anigoo Nool Inaa dan Guri Geeysan, Oorima Aysan kuu Noqon. Dhulkii ayaa la wareegay, Fadhigiina Waa u cuntami waayay. Intuu Si dhaqso ah u kac ay ayuu aaday Xaggii Wadaadkii Waxuuna Fadhiistay Dhinaca Midig.

Martida Badankooda Waxay Layaban Yihiin wiilka Wadaadka Dhinaciisa Fariistay, Qaar Waxay Leeyihhiin Wadaadka Hoos Joogihiisa Waaya, Kuwa kalana Waxay Isla Dhex mushaaxayaan Isagana Gabar Kale Ayaa Lagu Nikaaxayaa ama Arrin Muhiim ah yuu Wadaad ka la socodsiinayaa.

Wadaadkii oo wiilka soo agfariistay ka yaaban ayuu ku yiri, Maandhoow Maxaa kuu Darnaa"? Isagoo Codkiisa Hoos U Oranaaya.

Assalaamu Calaykum Ayuu Hadalkii Uga bilaabay, Fadhigii Intuu ka istaagay ayu u ku yiri, "Sheekhoow Caawa yaa la Nikaaxayaa Yaase Loo Nikaaxayaa?" Isagoo Wajigiisa Carro Weyn Ka muuqato.

Xaajiyadda Gabadhooda Yaa La Nikaaxayaa, Waxaana Loo Nikaaxayaa Wadaadka Horteeyda Fadhiya, Isagoo Gacanta Ku Taabtay Cali.

"Isagoo Codkiisa Kor u qaadaya ayuu yiri, Diinteena Macaan miyey Ogoshahay in nikaax la korsaaro Nikaax Kale"?

Dhidad Fara Badan ayaa ka soo Daadatay Su'aasha Lama Filaanka aheyd Darteed, waxuuna soo Qabsaday Cimaamadiisii oo Hortiisa u taalay, si uu isugu tirtiro, Waxuuna ku yiri, "Diinteena ma ogola Waxyaaba haas oo kale, Qofkii Ku dhaqmana Sharciga ayaa lala tiigsanayaa si waajibkiisa loo mariyo"!



"Haddaba Haddeey Arintu Sidaas Tahay Gabadha la yiraahdo Faatma....Anaa qaba".

Wadaadkii oo naxsan Waxuu Yiri,"Maxaa kuu cadeeynaya."?
si dhaqso ay ku jirto ayuu Jaakaddii uu Gashanaa uga soo bixiyay Waraaqdii Nikaaxa-wadaadkiina Gacanta Ka Saaray .

Isagoo Jaraynaya Ayuu Waraaqdii Akhris ugu dhaqaaqay, Waxaana Meeshii Ku Cadaatay iney Gabadhu aay ku nikaaxan tahay Wiilka la yiraahdo Saadiq, Wadaadka Kalana uu sid aas ku raali ahaado.

Isagoo Faraxsan ayuu Yiri"Dhib kastoo i soo gaara oo dhabarkeyga ku dhaca Waxaa iiga murugo Badan Dheeymantii aan jeclaa garbaduubka ku dhici doona. Hooyadeed ma xididihii Naxariistaa laga siibay Mise Qii maha Jacaylku Leeyahay Ayaysan Fahamsaneyn Jaceylkana wax la ilaalin karo Ma ahan Dhinac Kasta oo laga soo weeraro. Amakaaga i haaya waxuu Niyaddayda ka tirtirmaa Xuural ceeyntii aan jeclaa oo jilbaheyga ku jiifta

Xaajiya Binti waxay Sameyso ayeu Garan weysay. Habeenkii Huro oo dhan kama aysan imaanin, Waxaana Habeenkaas Hurdadii ka hor istaagay Fadeexadii ay u geeysatay Gabadheeda. Fadhi uma roona Istaagaba haka sii daraadee oo waxay raadineysay Meeleey isku Hi Imaansiiso. Kurbadda Baas ee ku taagan. Laakiin Waa eey weeyday. Had Iyo Goor Waxaa Horteeda Imaanayay Khladkii Weeynaa ee Haaeen Hore Djacay, Halkaaso ay ku nusqaantay Muxubaddii ay u haysay.

Gabadheedana Waxay ula Muuqatay intii la doono ee gabdho iney ugu Nadiifsan tahay, laakiin ma aysan noqonin sidii ay ka fileeysay. Sidee beey ku dhici kartaa Anigoon Ogeeyn ineey nin nikaaxsato? Ma iyadaa is maamusha Misa waa loo taliyaa. Ma ninkii aan aqoonta u lahaay ayay ii soo dhaweeysa tayi inteen ka galaa fadeexadda Suuqa iigu jirta. Haddii uu Nin Oo dhan ka soo haro kama siisanayo ee anigay iga aragtay Dabacsanaanta.

Xaajiya Binti Waxay ku dhex jirtaa Qolka Fadhiga, Isla Markaana Iyadoo ka soo kacday Quraac. Waxay ku fadhiisatay Kursi aad u qurux badan, Laakiin ma aysan dareemeyn raaxadda uu leeyahay. Wajigeeda Waxaa ka muuqday Xanaaq xad dhaaf ah oo beryahaas Paris La noqday Waxayna u wacday Gabadheeda oo qolka ku dhaganaa ku jirtay. Codkii Hooyadeed Markii ay Maqashay ayey Orad isku soo taabatay, Waxayna Soo Gashay Qolkii Loga Wacay, Iyadoo Dhinaca Hooyadeed U soo Socota Ayeey Waxay Maqashay Kursigaas Ku Fariiso. Faatma oo Hooyadeed U dhagal Nuglеeyd ayaa si dhaqso ah ku fariisatay Kursigii loo doorbiday, Waxayna Niyadda iska Tiri"Toloow Hooyadaa Maxay Kuu Wacday? Farxaddii aad ku aqoon Jirtay Koleytaba Kama muuqatee, Cabsi Darteed Ayey Wajigeeda Hoos ugu jeedisay. Qadar Daqiiqado ah Markii Wax la hadla ay Weeyday ayay Madaxii si tartiib ah sare ugu Qaaday, Waxayna Aragtay Hooyadeed inuu Maankeeda Meel kale Jiro, Markii danbe waxay si Qumaati ah u aragtay iyadoo ilmeeyneysa.



Waa Markii ugu Horeeysay oo ay indhaheeda Saarto Hooyadeed oo Ilmih ka daadaneyso.Naxdintii ayaa ka kala badatay oo meelaay waxka qabato ayeey Garan weeyday, Istaagii ay aa Culeys Weeyn ka saarmay, Intey is Xajisay Ayey ka soo istaagtay Meeshii ay Fadhiday Waxayna ku tiri Hooyo Macaan "Maxaa kugu dhacay? Iyadoo Ilintii uga tirtiraysa Gaca nteeda.

"Orod iga Fariiso Waxba ha ii soo Ord inee" Sababta Ilintan iga Keentay Anoo Cim rigan jooga waa adigee. Ma Waxaad ii soo Dhaweeysatay Nin sidii aan ogaa ii galay, Miyaadan Lahayn Caqli laysku Celsho. Anigo on Da'dan jira ayuu Xabsi igu Ogaaday, Bar ina Maxaad u maleeysaysaa Markii aad Oori u Noqotid?." Intey soo istaagtay Ayey Labo dharbaaxo oo kulul u galisay, Waxayna ku tiri, " Ma arki karo Wiilkaas." Hadalka aan ku leeyahay Si Fiican u dhagayso. Caruuroo dhan adigaan Kaa fiirsanayay,Haddana Ma wa xaad ii keentay Nin aan waxba haysan oo aad hoosta ka soo Mehersatid, Maxaad Sharafta iiga Qaadeysaa oo aad dadka iigu Ceebeeyneysaa, Soow ma ogid Magaca aan ku leeyahay Magaaladda. Wiilkan Waa Turufatoore oo jaceeyl aan waxba ka jirin kuu akhriyay ayaad run u qaadatay. Haddaba Haddii aad tahay G Gabadheeydii Aan Jeclaa oo aad Warkeeyga Yeeleysid Ninkaas Aragiisa Yaanan Kugu arkin, Wixii Waqtigan ka biloowda, Si Dhaqsana waa inaad Waraaqdaada Furitaanka Uga soo qaadataa, Jaceyl kastaa ha idin dhex maree

Haddii aad ka soo qaadan weeydana Wab-adheeydii ma aad ɟihid, Isagaana Waalid kuu ah. Xaq aad igu Leedahayna Ma jiro.

Faatma dharbaaxintii lagu Dhuftay ma aanay dareemin Fakar dheer iyo Jaceylka Wadnaheeda ku tagan, Fadhigiina u diiday Kolkii danbe waxay Ogaatay Ineey Hooyadeed aay ka joogto Middii ugu Danbeeysay, Waxayna Ku tiri"Wiilka Wakhti badan ayaan is jecleeyn markii Horana waxaan damcay inaan arinta k kuu soo bandhigo, Laakiin Cabsi Ayaa Ii di iday waxaanan Niyadda iska Iri" Haddii aad wiilka u sheegtid weey wareereysaa"Wal wal iyo Walaac ayaan ku waaraa la'aantiis, Wadnahayga barkiisuuna ahaay, Gardaradana Gacalkeyga Ka dhaaf, Ee Hooyooy Hadalkaas Dib uga fiirso .

"Waxba kama Fiirsanyo,".Bal daya Edeb daradeeda anigeey wax ii sheegeysaa iyadoo caruura.

"Hooyo Macaan Iga Raali Ahoow" Iyadoo madaxeeda Hoos U sii Foorarineysa Ilin ka socotay Oowgeed, .

Waa habeenkii Ugu Xumaa Inta Aay dhalatay. Waxay ka fikiraysay Go'aankii Degdega ahaa ee aay Hooyadeed La timid. Waqtigan Xageen ka Baadi Goobaa ee uu ku sugan yahay Xabiibkeeyga Qaaliga Ahaay.

Xaaladiisa Sideey Beey Ku sugan tahay illen Baryahan Aragtidiisa waan u hiloobay, Laakiin Sidee buu noqon doonaa Markii aan u so aa jeediyo, Arintii Khilaafsaneyd, Maxuusa iigu Jawaabi Doonaa.



Go'aanka uu gaari doono sidee buu ii quseeyn doonaa, Ma mid i farax Galiyaa mide mid ka duwan; Niyadeydu Waxay Saafi ku tahay inaan Isku figrad wada ahaano, si aan isaga Caabi ko cadawga na soo weeraraya, Weeydiimo intaa ka badan ayaa maskaxdeeda dhinac u jiidanay-ay, Waxayna ku Calaacalaysay inuusan Jabkan u dhici lahayn, Haddii uu aabaheed Noolaan lahaa, Waxaa Niyadeeda Dhex Rafanayay taloo kin badan oo ahaa Hooyadaa ma ku gacan see rtaa oo ma iska raacdaa Wiilkaa mudada dhe er aad is jecleydeen oo aad habaar Daris la noqotaan haddana waxay is barbar dhigtay qiimaha uu leeyahay Waalidka Iyo Jacaylka Waxay Ogaatay in Culeys weyn saaran yahay Xaga waalidka Sababtoo ah rafaadkii uus soo maray ayaan dhaweyn, La'aantiisha aysan nolol suurtoobeeyn, Waxayna Halkaas ku ogaatay inaan looga rooneyn Balantii ay Hooyadeed ka qaaday.

Fadeexadii Habeenkaas Dhacday Waxay ku faaftay Magaaladda Oo dhan, Gaar ahaan Xaaf addii uu Saadiq Daganaa. Ereyadaas Waxaa Aad uga Xumaaday Markii ay dhagahooda Soo gaareen Reerkii Saadiq Dhalay. Guriga waxaa Galabtaas Joogay Oday Jaamac Iyo Islaantuu Qabay, Waxayna kuwada Jireen Qolkii Iyaga U-baarka ahaa iyagoo Falanqeeynayay Xaaladda Uu wiilkoodu ku sugan yahay iyo Mustaqbalkiisa Danbe.

Guriga Waxaa soo galay Saadiq oo ka yimid kubad uu ku soo ciyaarayay Garoonka 21Oktoobar ee Kubadda Kulayga. Waxuu Dareemay Inuu Gurigu Ka duwan yahay Siddii Hore, Intuu soo orday ayuu soo galay qolkii ay ku jireen aabihii Iyo Hooyaddii,

slaan dabadeed wuxuu u tilaabaaday miisk
i dhexdooda yaalay si uu u soo qabsado
tamuusgii saarnaa.

"Bal fiiriya nin rag oo kale ayuu sha
a ii shubanayaa."Aabihiis baa kutiri isa
go ka gubanaya wararka magaalada lala dh
a meeraysanayo.

"Aabe maxaa dhacay?"si gooni ah ayaa
sa iigu xanaaqsan tahaye,"W ad ogtahay
wxii aad samaysay,"ayuu si kulul u yiri.

Ciilkii ahayay intuu u adkaysan waay
a ayuu ku yiri"Wiilkaygiiyow mar hore ay
ag ku iri"Gabadhaas aad kadaba ordaysid
isa dhaaf,adigana waad iska dhaga adkays
a, oo jacayl xun ayaad kadaba wareegaysaa
ogaadan ogayn wixii ka danbeeyay."
Waxtigan lajoogo jacayl waadhamaaday oo
guurkiisi ayaa haray ee wiilkaygiiyoow
arintiinii oo dhan way i soo gaartay had
iyo goorna waxaad maanka ku haysaa maahma
ahyo soomaaliyeed oranaysa"Gabar lama guu
rsadeaee reerkooda ayuu laguursadaa".
Haddii aad duco iga rabtid aduunyo iyo aa
khiradana gabadhaas intii karaankaaga ah ka
dheeow,gabadhii aad rabtidna ii keenso.
Yaalayaa kasoo karay markiisii ay erayad
aas dhagihiisa soo gaareen ilin baa indh
ihisa ku soo joogsatay,waxaana maskaxdii
sa u soo dhacday Faatma oo ay isla qosla
yaa kuna oranaysa,Xabiibi la'aantaa ma -
huno cuntadiina waan ka go'ay iyagoo dhex
fadiya aqlkooda.
Maxa intay u salaaxday ayay ku tiri,"Ha
ee macaan waalada adoogaa qaado oo meelna



ha uga leexanin,wiil baari ahna noqono oo
awaamiirta waalidkii qaata,"gabadhii kale
ee aad rabtidna keenso diyaar ayaanu kuu
nahay wixii aad u baahan tahay oo dhan.
Neef wayn ayuu ka soo baxday markii uu
aabihiis baxay,wuxuuna haoyadiis ku yiri,
"Hooyo sidee bay ku suurtoobaysaa inaan
gabar kale lahaasaawo iyadoo ay ifka ku
nooshahay Faatma cadeey."Mageedkii yaraan
ta aan ku beeray hadana jooga xiligii aan
ka miro guran lahaa ayaa iska gooyaa.saw
tacab qasaatay ma ahan.Muxubadii iyo isr
abadii ayaa ku badalaa kala tagid,hadaad
sidee bay ku dhici kartaa arintaas qalafs
ay?makolkii aan is iri,"hadaad hanaqaaday
ayaad hoos ii soo celinaysaan.

Hooyo macaan miyaadan ijeclayn?
maad iga qabatid adooga ilayn warkaaga ma
diidayee oo aad tiraahdid,"wiilka ha lood
aayo gabadha uu jecel yahay,"intaas uu ho
oyadiis baryayay wuxuu ku dhagan yahay gar
keeda.

Faatma oo arinta faraheeda kabaxday
wax ay samaysana garan la'kurbo ku taagan
tay awgeed ayaa waxay jeclaysatay iney Sa
adiq taleefan u dirto si ay ula socodsiiso
warkii murugada lahaa ee ay hooyadeed kala
kulantay waxayna ogaatay inaysan ku haboo
nayn iney taleefan ku sheekaysan karin,la
akiin ay habeenimada is arkaan hadii uu
ilaahay nafta ku simo.

Habeenku waa isniin ,saacaduna waxay
tilmaamaysay todobadii iyo barkii,ceeryaa
mo ayaa wada qarisay cirka,dhaxan aad u
qaboobayd ayaa dhacaysay.

Saadiq wuxuu si dhaqso ah u yimid goobtii balanta,isagoon nijdiisu saafi ahayn hadal kii taleefoonkana ka dhadhansaday waxyaabo uusan waligii ku arkin,mida kale ee usii dhamays tirtay isagoo baryahaa dabbe bixin waayay xaaladeeda,wuxuu kaka saari waysnaa iney si caadi ah uga maqan tahay iyo iney jiraan duruufo u diidan.

Shan daqiiqo kadib ayay Faatma timid, waxayna jeclayd iney Saadiq lakulanto. Dareen xoogleh ayaa ku abuurmay muuqaalkee dii kala duwan sidii uu ugabartay. isagoo meeshiisii fadhiya ayay ku soo orod ay oo xabadka xabadka u saartay waxayna ku tiri,"Xabiibi baryahaan waynu kala maqnayn ee sidee tahay,"iyadoo gacantiisa soo qaba tay dabadeedna dhunkatay.

Saadiqow waxaan jeclaan lahaa inaan kula sococsiiyo sababtii aan baryahay kaaga maq naa dagaal xoog leh ayaa ina dhex maray an iga iyo hooyaday waxayna iila timid arin wayn oo maankaygii ka xoog badiyay,murugana igu reebay si aan uga baxana aan garan waa yay.

"Gacaliso,maxay tahay arintaasi"?isag oo naxsan ayuu yiri.

"Saadiq agtiisa yaanan kugu arkin,aya y hooyaday igu tiri.hadaan kaadheeraado noloshayda ciriiri ayay ku jirtaa.

"Mashaakil malahan xamar wuu balaaran yahay,habeenkii aan is arkaynana taleefan ayaan iskala xiriiraynaa."

"Gacaliye,sidaad u fahantay ma,ahan."

"Waa sidee?"ayuu u sii raaciyay.

"Waa inuu k....."kadibna way aamustay.

"Gacaliye,mid uu carabkayga soo qaban karo ma ahan."



Intuu u soo dhawaaday oo dheda ka qa baaday,wajigiisiina keedii ku beegay ayuu ku yiri,"Gacaliso yaad u sheegaysaa hadaad aniga iga qariso"?.

Iyadoo xishoonaysa madeexadana hoos u sii foorarinaysa ayay lasoo booday,"Saadiq ow waa inuu ku furaa."

Dhulka ayuu si lamafilaan ah ugu dhac ay,hadalkiina qadar daqiiqado wuu kasoo bixi waayay.ruuxii wajigiisa arkana wuxuu kadareemayay murugadii jacaylka,waxuuna ru maysan la'yahay iney Faatma dhab katahay iyo in kale.Indhahuu wax ka arki waayay,wu xuuna kala garan waayay qofka hortaagan in ey Faatma tahay.wuxuu ku yiri,"Faatmaay,ma rnaba kaama filayn inaad ka weecanaysid wa dadii toosnayd iyo balantii adkeyd ee aan kala qaadanay,waxaana u malaynayaa inaad ilawday jacaylkii qotada dheeraa ee aan is lasoo wada maray,si kastaba xaalku ha ahaa dee marar badan ayaan waalidkaa kala kulmay rafaad iyo waxyaabo bini aadminimada ka ba xsan,waana isaga dulqaadan jiray jacayl aan kuu qabo dartiis."Fadeexadii habeenkii nin ka maal qabeenka ah lagusiiyay(lagugu nika axi )lahaana reerkayagu way wada maqleen, canaan adagna waan kala kulmay.Marka Faatm aay hadii aad hadalka hooyadaa raacday oo aanad ii soo jeedin oo jacaylkii sanooyinka dhisnaa halkaa ku burburiyay,aniguna waxaan raacay talada aabahay.

Mafiicana in talada waalidka ladiido intii aan ku noolaan lahayn dhib iyo habaar. waxaa ila wanaagsan inaan mar dhaw ku sii yo warqadaadii,mushkilada ku haysata aad kaga baxdide anagoo isku uur fayow.Walaal waxaad iga cafisaa intii aan waqtigii qaa liga ahaa kaa lumiyay.

Intaas markii uu ku yiri,Faatma indha heeda waxaa hal mar kasoo wada daatay ilin aan waligeed ka imaanin,waxayna ku tiri"Sa adiqow,la'aantaa majoogi karo,wadnahayga wehelkiisaad ahayd,"Asluubtii iyo aadaabt ii aan kaaga bartay mafilayo ruux kula mi d ah inaan ifka kahelayo,waxaana Saadiqow kaa ballan qaaday hadii aan adiga ku waayay inaan nin kale Oori u noqonin,intii aan Adduunka ku noolahay.

## QAYBTA TOBNAAD

Murugadii haysay iyadii farxad ugu m muujinaysa ayay hooyadeed u timid,waxayna u sheegtay arintii ay kala soo kulantay wiilkii ay mudada isku nikaaxsanaayeen.

Farxad daraadeed ayay xaajiyo Binti meel ay istaagto garan waysay,waxayna ugu soo bishaaraysay intii ay gaartay oo ay macruufo ahaayeenxxx iney kasoo qayb gala laan xaflada ay dhigidoonto gabadheeda fu ritaanka lasoo furay awgiis.

Goobta xafladdu waxay ahayd guriga X xaajiyadda,iyadoo ay kasoo qaybgaleen dad



badan oo guriga cambray,waxaana habeenkaas martida maamulayay gabdho dhalinyaro ah oo loo soo xulay,iyadoo habeenkaas lagu jabsh ay sharaab badan iyo cunto noocba nooc ah.

Faatma habeenkaas waxay u ahayd habee nkii madoobaa, intii ay soo martayna uga tilmaanayd,dadkii xafladda isugu yimid way wada faraxsanyihiin oo waxay dhagaha lara acayeen heesihii macaanaa oo si qumaati ah u soo gaarayay.

Faatma waxay fadhidaa meel koone ah, wajigeeda farxad ka muuqata iska dhaafe ma aysan jeclayn inuu lahadlo ruux,xafla dda kasoo qayb galay.Had iyo goor waxaa hor taagnaa muuqaalkii Saadiq iyo meelih ii ay ku haasaawi jireen waqtigan oo kale iyagoo jacayl xad dhaaf ah isu qaba.

Martidii xafladda isugu timid waxay wawada yaaban yihiin gabadha xafladda loo dhigayo siday tahay iyo sidii laga rabay, waxayna is waydiinayaan meeday fir firco naantii lagu yiqiinay,miyayse raali ka ah ayn xafladda loo samaynayo.Calool xumaddii intii ay adkaysan kari wayday ayay gabadhii lafadhiday ku tiri,"Walaal,majoogi karno kulaylkan ee inakeen aan banaanka iska fa dhiisanee,"gabadhiina codsigii way ka aq bashay.

Habeenkii hurdo si fudud uma aysan he lin,sariirtii ayay hadba dhinac ugu rafan aysay,caashaqii cudurkiisaa gubayay,waxay

na ku ducaysanaysay,"Ilaahow iga caymi-
mushkiladda ihaysata.Xubnihii ayaa awoo
di kari waayay in ay shaqadooda qabtaan
taah hoose ayay habeenkii oo dhan kabixi
waysay,sidaaduuna waagii ugu baryay.
Subaxnimmadii xaajiyo Binti waxay waysay
gabadheedii waqtigii ay arki jirtay,waxay
na soo aaday qolkii ay seexan jitay.
indhaha ayay ku dhufatay Faatma oo sarii
rta si khilaafsan u dul saaran,waxayna ku
tiri,"Faatma mawaqtigan ayaad jiiftaa,"
Jawaab dhakhso ah ayay ka wayday,waxayna
niyadda iska tiri;"Walee waxbaa jiree il
aahow amuuraha inoo fududee,"Markii ay
sariirtii dul timid ayay madaxeeda gacan
ta saartay,waxayna dareentay kulayl xad
dhaaf ah.Xalayto ayay dhaxantii xumad
si xun ugu dhacday,banaanka markii ay fa
dhiisanaysay ayaanba garanayay iney waxy
aabahaas iyo kuwo kasii daran imaanayaan
Intey u soo dhawaatay ayay ku tiri,"Hoo
yo macaan isbitaalka ma ku geeyaa?"

Faatma oo aan xasuusan karin Hadalba
iska daayee ayaa si dhib ah ugu tilmaant-
ay inaysan rabin.

Maalmo Badan ayaa ka soo wareegtay
faatma Jiradeeda, Xajiyaduna waxay is la
hayd weey ka soo roonaaneysaa, Laakiik w
weeyba ka sii dartay oo jirkeedii oo dhan
baa sii gurmay lafo lafana ka soo haray.



Xaajiya Binti waxay fiirsan kari weyday
gabadheeda Silaca ay ku nooshahay, Waxay
na u soo wacday dakhtar ay isku fiicnaay
een, si uu u ogaado xaaladda guud ahaan.

Markii uu arkay sideey Gabadhu u
taalo ayuu aad uga xumaaday waxuuna Xaaji
yadda ku yiri, "Maxaa kugu qasbay intey
Gabadhu sidaa noqoneysay inaad Guriga ku
haysatid." Ma waxaad Jecleyd Ineey Geeriy
ooto. Gabadha Dhallinyaradda ah Ma Wanaags
ana in sidaas loo galo oo mustaqbalkeeda
danbe lagu ciyaaro, Waxuuna ku dhaqaaqay
baaris guud si uu u hubiyo jiradda haysa
Markii uu ogaaday ineey dhiig la'aan hayso
waxuuna u qoray Daawooyin kala nooc ah si
ay ugu soo roonaato, Xaajiyaddana Waxuu
aray Daawooyinka ineey si joogta ah u qaa
dato, Akhbaarteedana lala socodsiiyo.

Kuwa ay ku caafimaado uma aysan noqo
nin daawooyinkii loo qoray, Waxayna Xaaji
yadda hadba ula carartaa meeshii lagu she
ego dhakhtar fiican, Laakiin Kuli ood Uma
aysan Faa'iideeyn oo mid walba kan kale
wuu uga sii daraa. Jahwareer ayaa ku dhac
ay meel ay wax ka qabatana wey garan weyd
ay, Kolkii ay quusatay oo ay is nacday ay
aa lagula taliyay ineey gabadha u qaado
dibadda, Iyadoo laga yaabo ineey ku soo
caafimaado haddii ilaahay dawo ugu daro.
Isla waqtigaas waxay maqashay inuu jiro
nin jiroonka Noocaas ah dadbadan ka dawee
yay kuna nool Cariga Mareykanka oo ku soo
takhasusay.

Xaajiya Binti, Waxay ka soo Noqotay Safarkii ay ameerika Gabadheeda Daawadda u gu raadisay, Nasiib xumase Dawadii Waxay noqotay mid aysan raali ka ahayn ilaa ay runta ka xxagtay, Dantana Ku Khasabtay.

Waxay jecleyd ineey ka cudur daarato Danbigii ay mar hore ka gashay. Ma ninkii aan mar sii horeysay aan godob ka galay ayaan hortiisa istaagi karaa, Caqligaan ka tilaabay miyaysan taas fool xumo igu aheeyn Intey is giijisay oo is geesinimo galisay ayeey diyaarsatay Hadalooyinkii ay kala ho rtagi lahayd Saadiq siduu ugu soo qashuuco dhinacaa Gabadheeda. Taloow Maxaan kula Ha dlaa Markii aan hor tago, Sidee buu ii qaabili doonaa? Mise wuu igu gacan sayri doonaa, Mise wuu iga aqbali doonaa Codsiga aan Wato? Waxay Niyadeeda ugu Bishaareysay Ineey Arintu Noqon Doonto Sidii uu ilaahay ugu talo galay. Marar Badan Ayeey u soo cid di rtay inuu Saadiq Guriga Ugu yimaado, Laakin waxuu u soo sheegay ineey Firaaqadu ku yar tahay, Shaqadda oo ka badatay bowgeed. Waxay Ka fursan weyday ineey Guriga Ka raadiso madaama ay Muraad Weeyn ka leedahay, Nasiib Wanaagse Waxay heshay isagoo jooga Gurigiisa. Xishoodkii Waxay uga soo tagtay Gurig eeda Madaama Runta la joogo. Guriga Saadiq Cidna ma aysan joogin oo cidii oo dhan waxa ay ku maqnaayeen Amuur.

Xaajiya Binti Salaan Dabadeed Waxay u ga Tacsiyeeysay Sidii Xumeyd ee ay kula dh aqantay, Waxayna ku tiri, W ilkeeygiiyoow Waxaan kaa baryayaa inaad naga Cafisid



Danbigii weeynaa ee aan kaa galay Aniga iyo Gabadheyda, Sababtoo ah Waxaan kugu Sameynay Waxyaabo fool xun oo uusan ruux binu-aa dan ah uusan u adkeysan karin, "Intey Fadh igii ka soo kacday oo xagiisa u soo talaabsatay ayay jilbihiisa ku dhagtay waxayna ku tiri iyadoo ilmeeyneysa"Midda kale ee aan Saadiqoow Kaa baryayo Waa inaad Wax nagala qabatid, Xaaladda Aay Faatma ku Sugan tahay meel harisna mareysa, Daraadaana Sariir u jiifta. Dawadeedana Meel Kasta oo la tagay laga soo waayay, Dakhaatiirtuna Waxay soo sheegeen Inay Adiga kuu Baahan tahay. Waxb a ha ka cabsan anigaa Garabkaaga Buuxinaya Wixii aad u baahatid Anigaa Dijaar Kuula ah Arooskiina oo Dibadda ah Anigaa Qaba Biloo yin badan ayaad ku soo raaxeeysaneysaan.Ha ddii kale Dukaaman Waaweeyn Ayaan Ddiin Furayaa ee Wiilkeegiiyoow Hooyadaa Oo kale a yaan Ahay ee iga Duceeyso."

Intii aay Hadleysay oo dhan Saadiq hoos ayuu Madaxiisa u fooraray, Isagoo Muujinaya Baarinimadda iyo Xushmadda uu Waalidka siinayo. Waxaan Marnaba Niyadiisa aan ka gu'in waxyaabihii ay ku sameeysay Iyo Waanadii Waalidkiis, Waxayse Labadaasi u noqdeen Canaan Adag ee uu soomaro intuu garaadsaday. Madaxuu kor u soo qaaday Oo Wajiga Gacmaha Marmarsaday, Waxuuna ku yiri, "Xaajiya Wax walboo dhaca waxay ka qoran yihiin xagga ilaahay, Wixii aad igu Sameey seen oo dhan Cafis Iyo Masamax ayaad iga T ihiin, Calooosheydana Nadiif ayay idiin tahay Arinta kale ee aad ii soo jeedisay wey igu

adag tahay, Sababtoo ah Wax aan ka qaban karo ma jirto, Ileen Gamuun Fara ka baxay gammasho malahan. Goortii aan Faatma Niyadda ku hayay oo jaceylkeenii Xididadeena ku saaqmay adigaa naga horjoogsaday, Jaceyl dhab ah ayaan isu hayney ilaa ay naga gaartay inaan dhiiga isku darsano, Waxaana isla jecleyn inaan Xaas Xalaal Ah Iskula Caweyno Waagii aad Khasabka iiga Furtay ayaana Niyadeeyda ka goostay. Markii ay Waalidkey Maqleen Foolxumadaas ayey Gabar macaan Iyo Heer sare oo aad Moodeysid Xuural Ceyntii Aduunka igu Dareen, Haddana uu Jaceeylkeedu Maraya Heer Sare, Dhawaan Wiil Qurux badan ayay ii dhashay Ilaahay ha ii daayee. Sida runta ah Laba reer mawada dhaqi karo, Waxa anad Ogaataa inaan Danbiga lahayn ee uu Xagaada ka yimid.

Casar liiqii ayey Fara baran kala soo noqotay Gurigii Saadiq, Waxayna ka soo Guratay Miro Kuwii ugu Qaraaraa. Guushii ay is lahayd gacantaada ayey ku jirtaa ayaa n noqotay mid ay ku khasaartay, In kastoo ay Saluugtay Hadaladii uu kula hadlay Saadiq, Dareentayna ineysan ka bixi karin Dhibaha iyo Rafa dka ay gabadheeda ku nooshahay. Malmuhu Isdaba joog ayeey u marayeen Xaajiyadu Raaxadii ay haysan jirtay ayaa isu badashay Xanuun. Noloshu hadba waxay ku kadisa murugo Iyo Ciil, Una Muuqatay Fnaey Faatma sidaas Nolol ugu suurtoobeyn. Waxay Talo ku goosatay ineey arintan Khalafsan ay u soo bandhigto Eheladeeda. Xaajiyadda Laf ahaanteeda Xanuunka Dhinaceeda ayuu ka hay ay.



Maadaama ay jiifkii iyo fadhigii u kala ro onaan waayeen, hurdadiina ay ka haaday, haba ynkiina ay ku dhamaysato Fakar iyo soojeed joogto ah, siday ahaatoba guud ahaan nolosh ii xaajiyaddu waa is badashay, jirkeedii oo dhan wuu sii faraaday, wajiga muraayadda oo kale u ifi jiray ayaa isu baday mugdi aan-indhaha lasiin karin. waxay niyadda iska le edahay"Tolow xagee iiga timid mushkiladaan ma habaar waalid ayaa ku haysta mise gef - hore oo aad samaysay ayaa lagaa gudayaa.

Dhawr bilood ayaa kasoo wareegtay kol kii ay kasoo roonaatay jiradii ku habsatay waxayna niyada ku haysay inuusan Saadiq wa li helin ruux u dhigaa Faatma cadeey, waxay isleedahay arintii aan filayay orodkeedana aan muddo dheer ku jiray ayaa ii ahaan kari wayday anigoo da'dan jirana ilin iga keent ay. Ilaahay hadduu raali kanoqdo amuurtii - aan abshirsaday wuu iga aqbalidoonaa goor kasta oo ay noqoto. Amar ilaahay soo qoray oo aan aqbalaadiisa sugayay ayaa igu adkaa day, amakaag iyo anfariirna igu riday ee il aahayoow amuurtayda ii fududeey.

Taleefankii guriga ayaa soo dhacay, laa kiin xaajiyadu ma ayaan maqlayn oo way isku buuqsanayd, sariirteeda ayay ku dhex rafana ysay, waxaana kaxoog badiyay mawjadihii mas kaxdeeda ladagay. Markintii laabkeeda ayay-warqaday boostada ka keensatay kalasoo bax day indhihii ayay wax ka arki wayday.

kolii danbe ayay aragtay gabadhii adeegtada ahayd oo ordaysa xaajiyo taleefan ayaa kuu yaal, sicaga jiid ah ayay uga soo dagtay sariirtii ay dulxoorayd, waxayna dul timid miiskii uu taleefanka saaraa. Kolkii ay kor u qaadayna waxay tiri,"

"Haloow, yaa waaye"?

"Waa walaalkaa Yuusuf ee iiga waran caafimaadkaada".

"Walaal xoogaa waan iska roonahay."

"Waxaan aad uga xumahay inaan baryahaan kuu soo socodsiin Xaalkii ay ku sugnayd - Faadumo ay iigu wacnayd mashaakil iyo murugo aan ku dhex jiray."

"Bal hadda iiga waran caafimaadkeeda."

Hadalkii ayaa kasoo bixi waayay, markii danbana wuxuu ku yiri"Abaayo wax walkoo dhaca waa xukun eebe

waxaanse aad uga xumahay inaan kuu shego arinta dhacday, carabkayguna soo qaban karin."

"Walaal maxaa dhacay?"ayay tiri iyadoo aad u naxsan.

Ilaahay samir iyo Iimaan hakaasiiyee gabadhii Faatma ahayd way geeriyootay!!!"isagoo codkiisa sii tartiibinaya.

Ileen jacayl waa loo geeriyoodaa,"Hubsiimo la'aaneey ba'waa erayadii ugu danbeeyay ee afkeeda kasoo baxa xaajiyo binti.

**D H A M M A A D**





# iima Qalantid

Maxamed Guuleed Aadan



# HUBSIIMO LA'AAN

"DHIB KASTOO I SOO GAARA IYO DHIBAATA KASTOO OO DHABARKEYGA KU DHACDA WAXAA IIGA MURUGO BADA DHEEYMANTII AAN JECLAA GARBADUUBKA KU DHICI DOO NA. HOOYADEED MA XIDIDIHII NAXARIISTAA LAGA SII BAY MESE QIIMAHA JACAYLKU LEEYAHAY AYAYSAN FAHA MSANEYN JACEYLKANA WAX LA ILAALIN KARO MA AHAN DHINAC KASTA OO LAGA SOO WEERARO. AMAKAAGA I HAAYA WAXUU NIYADDAYDA KA TIRTIRMAA XUURAL-CEEYNTII AAN JECLAA OO JILBAHEYGA KU JIIFTA.

XAAJIYA BINTI WAXAY SAMEYSO AYEY GARAN WEYSAY, HABEENKII HURO OO DHAN KAMA AYSAN IMAANIN, WAXAANA HABEENKAAS HURDADII KA HOR ISTAAGAY FADEEXADII AY U GEEYSATAY GABADHE-DA. FADHI UMA ROONA ISTAAGABA HAKA SII DAR-AADEE OO WAXAY RAADINEYSAY MEELEEY ISKU HIL-MAANSIISO KURBADDA BAAS EE KU TAAGAN, LAA-KIIN WAA EEY WEEYDAY. HAD IYO GOOR WAXAA HORTEEDA IMAANAYAY KHALADKII WEEYNAA EE HAB-EEN HORE DHACAY, HALKAASOO AY KU NUSQAANTAY MUXUBADDII AY U HAYSAY.

Taxanaha
(seyga)